# 10 MAGAC

## SOCDAALKA SAMADA TODOBAAD

# لأنك الله

## رحلة إلى السماء السابعة

# 10 MAGAC

## SOCDAALKA SAMADA TODOBAAD

**Cali Jaabir al-Fiifi**

**Turjume:**

**Cabdulxakiim Muxammad Obsiiye**

©Xuquuqda turjumaadda buuggan oo dhami waa ay dhawran tahay. Dhiganahan qayb ka mid ah iyo isaga oo dhan midna, waxba lagama doorin karo, loo ma adeegsan karo ujeeddo ganacsi, si ay ahaataba laguma tagrifali karo mudnaantiisa iyada oo aan oggolaanshiyo qoran laga haysan turjumaha.

**Daabacadda 1aad, 2022.**
**Hargeysa, Somaliland.**
**Waxa daabacday: Qalinmaal Publishing.**
**Hargeisa +252–63–3333755**
**qalinmaal@qalinmaalpublishing.com**

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَٰنِ الرَّحِيمِ

# TUSMADA BUUGGA


MAHADNAQ ........................................................XIII

**AFEEF** ........................................................XIV

**HIBEYN** ........................................................XIV

**HORDHACA QORAAGA** ........................................ 17

**AS-SAMAD (LA IRKADE)** ........................................ 21

**Macnayaasha Samadiyada** ........................................ **21**

**Hirar** ........................................ **22**

**Aragtiyaha bugta ah** ........................................ **23**

**Meerayaasha** ........................................ **25**

**Waad illaawaysaa!** ........................................ **26**

**Irko Ilaahay** ........................................ **27**

**Jiheeye** ........................................ **28**

**Ka saar qalbigaaga qayrkii** ........................................ **30**

**Tallaabooyin** ........................................ **31**

**Sarrayn** ........................................ **32**

**Xaqiiqo** ........................................ **33**

**AL-XAFIID (ILAALIYE)** ........................................ 36

**Qalbiyohow Xasil** ........................................ **36**

**Hillimmada Habowga!** ........................................ **37**

**Alle ayaynu illaaweynaa!** ........................................ **39**

**Malaa'igta iscidhbisa** ........................................ **40**

**Laba Qaws dhexdood** ........................................ **42**

**Quraarad** ........................................ **42**

Ka weyn oo ka badan ........ 43

Wuu Kugu Difaacayaa ........ 44

Dooxii Dugaagga ........ 46

Waan baahanahay ........ 48

Maandhoow! ........ 50

Cidhiidhi ........ 50

AL-LADIIF (TUDHID BADANE) ........ 55

Tudhaalayaasha Qarsoon ........ 55

Neecawda Tudhidda ........ 57

Dhagax ........ 58

Arrimaha Dahsoon ........ 59

Riyooyinkii Fogaa ........ 62

Tudhidda ilbidhiqsigii ugu dambeeyay ........ 64

ASH-SHAAFI (BOGSIIYE) ........ 68

Maanta kadib, ma jiro xanuun ........ 68

Ma Garanaysid! ........ 72

U Noqo Xaggiisa! ........ 74

Ballan Hore ........ 76

Hoosta Ka Xarriiq ........ 77

Raalli Ahaansho ........ 79

Webiyo Dambiyo ah ........ 81

AL-WAKIIL (LA TALASAARTE) ........ 85

Rabbi Talasaaro ........ 85

Qorshe-Sannadeed ........ 87

**Alle Isu Dullee................................................................... 89**
**Illinta Dhoollacaddaynta! .................................................... 90**
**Ogsajinta Nolosha ............................................................. 91**
**La'aantii noloshu waa Jaxiima!............................................. 92**
**Alle ayaa igu filan!.............................................................. 93**
**Sabab lagu qanci karo ........................................................ 95**
**Digtoonow! ......................................................................... 96**
**Waxyaabo halis ah............................................................... 98**

*Sifaadkaaga deyr ma xidho*
*Dareenku ma gaadhi karo*
*Garaadku ma duubi karo*
*Dibnuhu ma macnayn karaan*
*Qof doonay inuu dhex galo*
*Ku daalay ma dhaafi karo*
*Dunjiga khalqigaagu yahay*
*Haddii gelin laysu dumo*
*Raggiyo dumar laysu guro*
*Jinkiyo insi laysku daro*
*Hadday ku dedaal galaan*
*Intay dardartoodu tahay*
*Hadday fadal deeddamaan*
*Muggooda darandoorriyaan*
*Haddii badda loo dardaro*
*Dawaad milan looga dhigo*
*Dureemada loo qorqoro*
*Waxay ku dambaynayaan*
*Inay dib u soo gurtaan.*

*-Hadraawi: Daba-Huwan*

# MAHADNAQ

Mahadda Alle ee ma dhaafaanka ah kadib, waxaan u mahadcelinayaa saaxiibbadii igu dhiirrigeliyay tarjamada buuggan oo ay ugu horreeyaan: *Cabdishakuur Gayre, Muxiyadiin Cali Barkhad, Cabdiqani Axmed Yoonis* iyo *Mabruuka Cabdiraxmaan.* Mar kale, waxaan u mahadcelinayaa sheekhayga *Maxammed Gaanni* iyo *Mustafe Mahad* oo qayb libaax ka qaatay soo bixidda buuggan. Waxa kale oo si guud u mahadsan akhristayaasha sharafta leh ee ka falceliyey, isla markaana talooyinka wax-ku-oolka ah ila wadaagay markii aan la wadaagay turjumaadda buuggan.

Ugu dambayn, waxaan u mahadcelinayaa madbacadda casriga ah ee **Qalinmaal** oo tunka u ridatay daabicidda, keenidda iyo suuqgeynta buuggan.

Alle ayaa mahad leh

# AFEEF

Bismillah

Maadaama oo buuggani yahay turjumaad aan ku sameeyay buug ka hadlaya toban ka mid ah magacyada Ilaahay SWT iyo nuxurka ay xambaarsan yiihin, isla markaana ay adag tahay in uu af naqo shakhsi sidayda oo kale beyd-gaab ahi; waxaan ka afeefanayaa wixii gef iyo gaabis ah ee aad ku dhex aragto buuggan, kuwaas oo aan iga ahayn kas iyo kutalagal, balse iga ah awood iyo ogaal.

Akhristaha sharaftalahoow, waxaan kaa rejaynayaa in aad wixii khalad ah iigu cudurdaarto, isla markaana aad ila turxaan bixiso wixii i seegay. Taladaada, tusaalahaaga iyo toosintaadaba gacmo furan iyo qalbi xaadhan baan ku soo dhawaynayaa. Eebbe, waxaan ka baryayaa waafajinta tubta toosan, naxariistiisa iyo dambidhaafkiisa ballaadhan.

*Cabdixakiin Maxammed Obsiiye*

# HIBEYN

Buuggan waxa aan u hibeeyay tii igu tidhi habeen aniga oo toddoba jir ah: *"ma tukatay salaaddii cishe?"* Aniga oo been sheegaya ayaan ku idhi: *"haa."* Inta ay si tuhmo leh ii fiirisay ayay igu tidhi: *"waxaad doonto dheh, dhab ahaantii wuu ku arkayaaye!" Wuu ku arkayaa,* ayaa i argagaxgelisay, waxaanay iga dhigtay mid kaca oo tukada -in kasta oo aan been sheegay!

*Hooyaday baan u hibeeyay!*

*Ma jiraan cabsi, murugo, gabbal-dhac, habeen iyo mood[1], maxaa yeelay waxa aad tahay Ilaahay.*

*Qalbigayga waxa maanshaysay filasho, waayo waxa aad tahay Ilaahay.*

*Ruuxdayda waxa buux-dhaafiyey hillaac, sababta oo ah waxa aad tahay Ilaahay.*

[1] **Mood:** daliigo balballaaran oo sagalka u eg oo wakhtiyada roobka cirka ku dhigma kolka qorraxdu dhacdo. Qaamuuska Af-Somaaliga. Yaasiin C. Keenadiid. Waa erayga aynu ku dhiganno Fiqhiga "الشفق الأحمر".

# HORDHACA QORAAGA

Mahad oo dhan waxa iska leh  Alle SWT, naxariis iyo nabadgelyana korkiisa ha ahaato Rasuulkiisa, asxaabtiisii iyo cid walba oo raacday. Intaas kadib:

Kuwani waa weedho ku saabsan qaybo ka mid ah magacyada Ilaahay. Waxaan qoray weedhahan aniga oo tamardarro, wahsi iyo aqoondarro kaga sugan Allaha awoodda, kartida iyo ogaalka badan. Waxa kale oo aan isku hawlay in uu fahmo buuggan qofka uu ogaalkiisu dhexdhexaadka yahay, ka buka ee sariirta jiifa, ka murugaysan ee illintu ka qubanayso, iyo ka baahan ee ay duruufuhu ragaadiyeen. Waxa hubaal ah qalbiga oo ku xidhma, barta, iska jira, jeclaada, ka baqa, isla markaana fisha Ilaahay SWT, sida uu yahay sirta liibaanta aakhiro, si la mid ah in uu u yahay sirta badhaadhaha iyo barwaaqada ifkan. Sidoo kale, xilliyada ay inala soo darsaan tiiraanyada, waswaaska iyo dhibaatadu; xaaladahan is-huwani si dhammaystiran ayay u idlaan doonaan haddii uu addoonku si dhab ah qalbigiisa ugu jeediyo xagga Allaha aan u abuurin wax aan ahayn cibaado. Irridda magacyada Ilaahay ee wanwaagsani, waa mid iimaaniya oo weyn. Albaabkani, addoonka waxa uu gelinayaa caalam dahiran oo gaar ah. Nafta waxa uu ka dhigayaa mid la sujuudda weyni, ruuxdana waxa uu ka dhigayaa mid u go'da hogasho iyo jacayl. Ujeeddada aan u qoray buuggani waa in uu idin tuso Ilaahay, waa in uu farta ku fiiqo qadhiidh yar oo ka mid ah deeqihiisa, waa in aan xasuusiyo walaalahay in Alle awoodo wax kasta oo fadligiisu weyn yahay, isla markaana uu yahay maqal iyo arag badane.

Waxa aan doonayaa weedhahan in aan ku masaxo, kuna bogsiiyo garbo ay daashatay gaajo iyo madaxyo la ildaran xanuunno. Waxa aan danaynayaa xuruuftayda in aan ku aaso illin, kuna damiyo holaca ka baxaya feedhahan. Haddii aynaan baran magacyada Ilaahay ee wanwaagsan, waxa aynu ku dhex dayoobaynaa lama degaanka. Maalmeheenna waxa baabi'inaya kulka, kaarka iyo kadeedka lama degaankan. Sidoo kale halis joogto ah ayuu innagu haynayaa walbaarka naftu. U dooro Alle: *aqoon ahaan, iimaan ahaan, kalsooni ahaan iyo cibaado ahaanba.* Intaas kadibna ka dhigo: *wehel, liibaan iyo deganaan.* Ama dooro: *dayow, dayac, cidhiidhi, in aad dareento quus iyo qarracan-nafeed.*

Buuggan dhexdiisa kuma sheeganayo koobid, aqoon iyo horrayntoona, balse waxaan ku dhex sheeganayaa wahsi, gaabis iyo baahida weyn ee aan u qabo cafiska iyo dambidhaafka Ilaahay SWT. Buuggan dhexdiisa haddii uu ku jiro wanaag, Alle ayaan ka tuugayaa in uu ku dhex faafiyo dadka, haddii kalena, Alle waa uu og yahay gaabiskayga. Aniguna waan ka warqabaa cafiskiisa. Alle, waxaan ka baryayaa niyad-wanaag iyo in uu iga dhaafo wixii uu qalinku halmaamay ama qalbigu seegay.

Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato sayidkeenna Muxammed, baryadeenna ugu dambaysaana waa: *"mahad oo dhan waxa iska leh Allaha uumay kownkan oo dhan."*

**Cali Jaabir Al-Fayfi**
**27/7/1437H**

# ٱلصَّمَدُ

*"Dunida oo dhami ma awoodayso in ay kaa hayso xumaan aanu Ilaahay kaa celin, sidoo kalena ma tahlayso in ay kaa difaacdo xumaan uu Rabbi kuu qoray."*

## AS-SAMAD (LA IRKADE)

Haddii ay tamardarradu hareerahaaga ka dhisatay xabsi cidhiidhi ah oo aanad ka bixi karayn, haddii ay baahiyi ku hareeraysay, haddii ay balaayo ku jilbadhigatay, haddii ay welwel iyo warbahaar kugu tiiqtiiqsadeen iyo haddii ay ruuxdu kugu aammintay u cararka meel qarsoon; xilligan waxa aad u baahan tahay in aad u iilato isaga (Alle). Magaca Eebbe ee *as-Samad,* waxa uu ku siindoonaa shay kasta oo aad u baahi qabto; si aad awood ugu yeelato noloshan iyo si aad ugala hortagto isla-weyni, isla markaana aad go'aan adag kaga gudubto caqabadaha ku horyaalla! Allaha Samadka ah, la gal heshiis cusub adiga oo aamminaya barriyi in ay wax badan kaga wacnaan doonto maanta!

### Macnayaasha Samadiyada

Sida kuu muuqata, *as-Samad* waa magac ay xeeldheer tahay haybaddiisu, xuruuftiisuna ay xooggan tahay. Waa magac uu weyn yahay macnihiisu oo aanu badnayn xuskiisa iyo sheeg-sheegiisu, isla markaana leh qadarin gaar ah. Irkashada Alle, waxa aad mooddaa humaagyada ugu mudan ikhlaaska ee lala yimaaddo cibaadada dhexdeeda. Xilliga cibaadada, qofka aad ugu soo

xaadiriya qalbigiisa macnaha ikhlaaska, Ilaahay waxa uu dhaxalsiiyaa astaanta u hoggaansanka hiiliyihiisa, in uu irkashado iyo in aanu magangelin cid aan isaga ahayn. Hadda, waxa aynu gudagelaynaa dunida *Samadiyada*; si aynu u baranno wax ka mid ah macnayaasha *as-Samad*. *As-Samad,* waa Allaha ay irkadaan noolayaashu (magangalaan). Kanina waa macne ka mid ah macnayaasha ugu waaweyn ee *as-Samad*. Sidaas awgeed, ayaynu macnahan u dhexgelidoonnaa. *As-Samad,* waa ka la magansado xilliga barwaaqada, waa ka la garabsado wakhtiga adag, waana ka xaggiisa loo argagaxo samanka saxariirka. Magacani, waxa uu ku xusan yahay suuradda ugu weyn, kana mid ah suuradaha ugu gaagaaban musxafka Quraanka kariimka ah. Waana suuradda *al-Ikhlaas* oo u dhiganta seddex meeloodoow meel Quraanka kariimka ah. Rabbi SWT waxa uu yidhi:

﴿قُلۡ هُوَ ٱللَّهُ أَحَدٌ ۝١ ٱللَّهُ ٱلصَّمَدُ ۝٢﴾ [الإخلاص : ١ - ٢]

*«Waxa aad (Nebiyoow) tidhaahdaa: isagu; Ilaahay, waa mid keli ah. Ilaahay, waa ka aan baahan ee loo baahdo.»*

Nooluhu guul ayuu u baahan yahay, waxaanu yidhaahdaa: *Allahayoow!* Waxa uu u baahan yahay ilaalo, waxaanu yidhaahdaa: *Allahayoow!* Waxa uu u baahan yahay hanuun, waxaanu yidhaahdaa: *Allahayoow!* Waxa uu u baahan yahay tudhid, waxaanu yidhaahdaa: *Allahayoow!*

**Hirar**

Ilaahay SWT, baahiyo ayuu kugu wareejiyey; si aad naftaada ugu hareerayso magacyadiisa iyo astaamihiisa. Kanina waa macna *Samadiyada*. Daqiiqad kasta oo ka mid ah noloshaada, isaga ayaa

aad u baahan tahay, haddii aanad ugu noqon doorashana, khasab iyo sandulle ayaad ugu laaban doontaa. Beeroolaha, amminta ay dib uga dhacaan midhuhu ee ay baahidiisu badato, isla markaana ay yaraadaan biyuhu, inta uu fiiriyo cirka ayuu yidhaahdaa: *Allahayoow!* Marka ay isgaraacaan hirarku, rakaabka doonta saaranna ay ka quustaan nolosha, waxa ay ku hadaaqaan: *Allahayoow!* Wadaha diyaaraddu marka uu ogaysiis ku bixiyo waxa istaagay taayirrada diyaaradda, waxaanan soo dhex wareegayaa gegida, si loo cillad saaro; rakaabku waxa ay illaawaan shakhsiyaadkii muhiimka ahaa, mana xasuustaan cid aan ahayn Allaha ay gacantiisa ku jiraan lahaanshaha shay kasta ee wax magangeliya, balse aan isaga la magangelin!

Hadda, indhahaagu waxay fiirinayaan mishiinka lagula socdo garaaca wadnaha bukaanka (ECG). Waxa aad eegaysaa xarriijimaha qalqallooca. Neefta bukaankaaga ayaa isa sii dhimaysa. Waxa sii yaraanaya garaaca wadnihiisa, laymankiina hoos ayay u soo hoobanayaan. Ilbidhiqsigan, waxa aad illaawaysaa magaca kalkaalisada. Xasuustaada waxa ka baxaya foolka dhakhtarka, adiga oo filasho qabana waxaad odhan: *«Allahayoow, ahow garabkiisa!»*

## Aragtiyaha bugta ah

Duq reer miyi ah oo la yidhaahdo Xusayn ayaa maalin maalmaha ka mid ah u yimid Nebiga SCW. Deedna sheekadan baa dhexmartay:

*Nebiga NNKH*: Xusaynoow, imisa Ilaah baa aad caabuddaa?

*Xusayn:* todoba Ilaah. Lix dhulka jooga, iyo mid cirka ku sugan.

*Nebiga NNKH*: Ilaahee ayaad u argagaxdaa xilliga cabsida?

*Xusayn:* ka cirka ku sugan.

*Nebiga NNKH*: kee ayaad jeceshahay?

*Xusayn:* ka cirka ku sugan.

*Nebiga NNKH*: faraha ka qaad ka dhulka oo caabud ka cirka ku sugan[2]. Xusayn waa uu islaamay. Ninkani waxa uu ku qancay macnaha *Samadiyada*. Sababta oo ah, Allaha aad irkato xilliyada cabsida iyo wanaagga, ayaa keligii mudan in aad u sujuuddo.

Iimaanku waa aragtida ugu fudud jiraalkan. Umana baahna kutub iyo falsafad, iyo in la dhuuxo ama la qaybiyo. Waa eray keliya ee u dheh si daacad ah, kadibna iska dhaaf aragtiyaha bugta ah. Quraanka kariimka ah oo soo koobaya qodobkan ayaa yidhi:

﴿قُلِ ٱللَّهُۖ ثُمَّ ذَرۡهُمۡ فِي خَوۡضِهِمۡ يَلۡعَبُونَ ۝٩١﴾ [الأَنْعَام : ٩١]

*«Waxa aad tidhaahdaa: Alle, kadibna kaga dhex tag baadilkooda iyaga oo ciyaaraya.»*

Erayga Alle oo qudha ayaa innagaga filan aamusiinta beenaha ugu waaweyn noloshan. Qof walba guntiisa, gudaha unug kasta iyo hareeraha guud ahaan aroorayaasha, waxa ku jira waxyaabo si wacan u garanaya Rabbi SWT, kuwaas oo u sujuuda, una tasbiixsada. Gaalka gaalka ahi, amminta uu maqlo Quraanka, wuu hoganayaa. Sheekooyinka ku xusan siirada waxa ka mid ah in Rasuulku suuradda *an-Najmi* ku dul akhriyey Mushrikiintii Maka oo ku sugnaa masjidka xurmada leh, isla markii uu dhameeyayna ay wada sujuudeen. Haa sujuud ayaa ay u dheceen xataa kuwii eryey ee dhibay, sidoo kalena qorsheeyay dilkiisa! Waxyaabaha ku

---

[2] Xadiiskan Tirmid ayaa ku soo saaray sunankiisa (3820-12/452).

jira unugyadooda iyo aroorayaashooda ayay ka soo burqatay tamar wadata iimaan cabsi ahi, waxaanay ka dhigtay kuwo u dhaca qadaadqadaad!

## Meerayaasha

Alle, nafaha addoomihiisa waxa uu ku uumay baahi si ay u jeclaadaan. Waxa jira jaad ka mid ah jacaylka oo muqaddas ah, kaas oo aanu dhergin waxaan ahayn *in loo foorarsado isaga, in lagu dawaafo gurigiisa, in la istaago hortiisa, in laga kaco hurdada iyo ugu dambayn in wax kasta oo bilic leh loo bixiyo dartii.* Humaagyada nolosha oo dhan ayaa si hoose kuu leh: *ka aad ka raadinayso carshigiisu, waa uu ku maqlayaa.*

﴿ٱلرَّحۡمَٰنُ عَلَى ٱلۡعَرۡشِ ٱسۡتَوَىٰ ۝٥﴾ [طه : ٥]

*«Allaha Raxmaanka ahi, carshigiisa ayuu ku ekaaday.»*

Nin dambiile ah ayaa la keli noqday gabadh, kadibna waa uu damcay, balse way ka diidday codsigiisii. Isaga oo ku boorrinaya xumaanta, ayuu ku yidhi: *«innama arkayaan cid aan meerayaasha ahayni.»* Si qab iyo isla-weyni ku dheehan yihiin ayay ugu tidhi: *«mee kii abuuray?!»* Mee Ilaahay? Qalbiga gabadhani waa mid nool oo irkanaya Ilaahay. Isaga ayuu iska jirayaa, sidoo kalena waxa uu og yahay in uu yahay xog-ogaal iyo maqal iyo arag badan wax kasta koobaya!

Qalbigaaga oo irkada Alle, waxa ay meteshaa sida qofka tukanayaa uu ugu jeedsado Kacbada. Sidaas ayaa laga doonayaa qalbiga. Addoonku, baahiyihiisa ayuu u qaybinayaa jihooyinka oo dhan, balse jihada hore Alle oo keliya ayaa iska leh. Waxaad doonto dhig waaxda midig ee qalbigaaga, waaxda bidixna ku kaydi

wixii kula qummaanada, balse jihada hore ha dhigin waxaan ahayn raalli ahaanshaha Alle. Hana ku kaydin waxaan ahayn iska ilaalinta Rabbi iyo jacaylkiisa.

**Waad illaawaysaa!**

Marka aad baadho shay ee aad weydo, faraha ka qaad oo ku mashquul Rabbigaa sababta oo ah, isaga ayaa ku garab mariyey shaygan si aad u irkato, isla markaana u tidhaahdo: *«Allahayoow, ii soo celi baadidayda.» Waanu kuu soo celinayaa.»* Ilaahay, waxa uu kaa doonayaa in aanad kaga mashquulin baahidaada. Laakiin adiga ayaa ka mashquula oo illaawa! Sheekh Islaam Ibnu Teymiya AHN, waxa uu leeyahay hadal aad u qiimo badan oo inna tusaya ujeedka hadalkan sare ee aad u dhuux, kadibna ka dhego dhufays aad ka gasho gaajada, dhibka iyo baahiyaha.

Sheekhu waxa uu yidhi: *«balaayo ayaa ku dhacda addoonka. Ujeedka uu Alle u baryayaa waa in uu raadiyo baahidiisa iyo in laga kor qaado dhibka ku dhacay. Kadibna waxa uu u gucleeyaa baryo iyo isbihinbihin. Labdan fal, in kasta oo ay ka mid yihiin cibaadada, haddana yoolkiisa ugu weyni waa in uu helo baadidiisa oo ah; quud, guul iyo cafis furan. Baryada iyo isbihinbihinta ayaa u furaya addoonka irridaha rumaynta Alle, garashadiisa, jacaylkiisa, ku raaxaysiga xuskiisa iyo baryadiisa oo uga qiimo badnaanaya baahidii dabada ka riixaysay. Tani waxa ay ka mid tahay naxariista Alle. Rabbi, baahiyo adduun ayuu ku ridaa addoomaha si ay u gaadhaan ujeeddooyin diineed oo sarreeya.»*

Xilligii Muuse CS ayuu cirku qaaday, duniduna waxa ay isu rogtay omos iyo abaar daran. Muuse iyo tolkii oo ahaa kumanaan iskugu jiray: *rag, dumar iyo carruur,* ayaa soo baxay. Muuse, waxa uu

arkay qudhaanjo soo baxday oo sare u taagaysa gacmeheeda, taas oo miciin bidaysa Eebbaha daruuraha. Muuse, ayaa garwaaqsaday irkashadan iyo isbihinbihinta qudhaanjada in uu xigo roob weyni. Intaas kadib, tolkii ayuu ku yidhi: *«iska noqda, baryadii waa la idinkaga filnaadaye.»* Dadkii waxa ay soo noqdeen iyaga oo maqlaya onkodkii iyo dhibicii roobka. Waagii aan yaraa waxa aan maqli jiray sheekh ka mid ah culimada Quraanka oo ku ducaysanaya: *«Eebbow, safarkayaga ku fur irriddaada, hana naga fogayn garabkaaga.»* Socdaalkeenna oo dega irridaha Rabbiga deeqsiga ah, ayaa ah macnaha magaca *al-Samad.*

## Irko Ilaahay

Waxa waajib kugu ah in aad ogaato, haddii aan Ilaahay ogolaan dawadu in ay la falgasho jidhkaaga, kuma aad caafimaaddeen. Isaga (Alle), miciin bid, waa uu ku bogsiinayaaye. Maanka ku hay gaadhigan baaxaadegayaa haddii aan Alle kaa leexin, waxa aad ka mid noqon lahayd reer aakhirood. Isaga irko, waa uu ku ilaalinayaaye. Xasuusnow, haddii aanu ku dhowrin markii aad ku socdaalaysay badda dhexdeeda, hadda calaf iyo caloolgelyo ayaad u noqon lahayd kalluunka bad-weynta. Isaga miciin bid, is uu kuula jiro. Alle SWT, waxaad u miciin biddaa si aad u raaxaysato, una xasilo qalbigaagu. Eebbe la'aantii, noloshaadu silic iyo saxariir ayay ku idlaanaysaa. Bal hadda dhegayso dadkan ay la baaxaadegayso doontu. Nolosha ayay ka quusteen oo duufaanno ayaa garaacaya. Diinta ay doonaan ha haystaan ee waxaad maqlaysaa iyaga oo ku dhawaaqaya, kuna celcelinaya: *Allahayoow!*

﴿هُوَ ٱلَّذِى يُسَيِّرُكُمۡ فِى ٱلۡبَرِّ وَٱلۡبَحۡرِۖ حَتَّىٰٓ إِذَا كُنتُمۡ فِى ٱلۡفُلۡكِ وَجَرَيۡنَ بِهِم بِرِيحٍ طَيِّبَةٍ وَفَرِحُواْ بِهَا جَآءَتۡهَا رِيحٌ عَاصِفٌ وَجَآءَهُمُ ٱلۡمَوۡجُ مِن كُلِّ مَكَانٍ وَظَنُّوٓاْ أَنَّهُمۡ أُحِيطَ بِهِمۡ دَعَوُاْ ٱللَّهَ مُخۡلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ لَئِنۡ أَنجَيۡتَنَا مِنۡ هَٰذِهِۦ لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ٢٢﴾ [يُونُس : ٢٢]

*«Alle, waa ka idinku socodsiinaya bannaanka iyo badda dhexdooda. Markii aad fuusheen doonta, kadibna uu ku kexeeyay dabayl wanaagsan, dadkiina ay ku farxaan; ayuu yimi duufaan darani, hirarkii waxa ay ka soo keceen dhan walba, rakaabkiina waxa ay u maleeyeen in la hareereeyay. Markan ayay baryayaan Ilaahay iyaga oo u keliyeelaya cibaadada, isla markaana leh: haddii aad naga badbaadiso dhibkan, waxaannu ka mid noqonaynaa kuwa kuu mahadnaqa.»*

Alle SWT, gudahaaga waxa uu ku beeray baahiyo, ujeedkuna waa in aad mar kasta u xasuusato magaciisa. Waxa jirta xasillooni koobaysa jiritaankaaga marka aad tidhaahdo: *Allahayoow*. Alle, haddii aanad ku odhan dookh iyo doorasho, khasab iyo sandulle ayaad ku odhandoontaa. Haddii aanad ku xusin iimaanna, awood ayaad ku xusidoontaa. Haddii aanad magaca Alle, ku tiraabin xilliga barwaaqada, wakhtiga balaayada ayaad ku qaylindoontaa!

## Jiheeye

Maxaynu u sugaynaa baahi inoo celisa xaggiisa? Balaayo inna xasuusisa magaciisa iyo musiibo ina gelisa masjidka? Miyaanu mudnayn in aynu isu dhiibno balaayo la'aanteed?! Miyey inagu yaraadeen galladihiisa ay ka midka yihiin: *nolosha, caafimaadka, iimaanka, ammaanka iyo liibaantu*? Kadibna waynu ka

mashquulaynaa Ilaahay inta ay inagu dhacayaan musiibooyin ka saaraya maankeenna cid kasta oo aan isaga ahayn?! Jiheeyaha qalbigaaga u jeedi dhanka Ilaahay, kadibna soco xataa haddii aad ku siqayso jilbaha, waad gaadhidoontaaye. Rabbi SWT waxa uu yidhi:

﴿فَأَيۡنَمَا تُوَلُّواْ فَثَمَّ وَجۡهُ ٱللَّهِ﴾ [البَقَرَة : ١١٥]

*«Meel kasta oo aad u jeedsataan, waxa ahaaday wajiga Ilaahay.»*

Hebel haddii aad saaka ka magangasho dadka, dhab ahaan galabta ayuu kaa xidhanayaa irridihiisa. Haddii uu kaaga hiiliyo Sayd, runtii kaagama hiilinayo Camar. Maanta, haddii uu ku siiyo, barri ayuu kuu diidi karaa. Ilaahay miyaa! Waa deeqsi aanay dhammaan kaydadkiisu.

﴿هُوَ ٱلۡحَيُّ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ فَٱدۡعُوهُ﴾ [غَافِر : ٦٥]

*«Alle, waa ka nool, Ilaah xaq lagu caabudaana miro isaga mooyaane, ee barya.»*

Hadh iyo habeenba waa deeq bixiye. Haddii aad tahay dulmane, dadka oo dhan ayuu kaaga hiilinayaa. Irridihiisa lama xidho. Saacad kasta labadiisa gacmood way furan yihiin, waana deeqsiga deeqsiyada. Sidaas awgeed, ayay u irkadaan noolayaashu. Haddii aad tijaabiso wax-weydiisiga asaaggii, waxaad soo laabanaysaa adiga oo faramadhan! Marka aad wax weydiisato asaaggii, waxa suuragal ah in aanu kaa yeelin, ama uu ku yeelo, balse uu kaa dib-dhaco, ama waxaan kugu filnayn uu kuu soo taago. Sidoo kale, waxa dhacda in uu ku yaso, ama aanu ku quudhsan, balse ay naftaadu hanjabto.

## Ka saar qalbigaaga qayrkii

Bari ayaan galay xafiiska wakiilka jaamacadda, ujeedkayguna waxa uu ahaa in aan kala xaajoodo arrin la xidhiidha waxbarashadayda. Waxaan isku hawlay in aan faahfaahin dheeriya ka bixiyo hawshii aan u socday, balse qofkii xafiiska fadhiyay ayaa igu yidhi: *«hadal badan looma baahna.»* Dadku uma baahna hadal badan. Laakiin, Alle waa uu ku jeclaanayaa marka aad ku celceliso baryadiisa. Rabbi, waxa uu jecel yahay addoonka ku celceliya baryada ee maxaad uga tegaysaa, uguna ashtakoonaysaa qayrkii?! Nebigu NNKH, Ibnu Cabbaas waxa uu ku yidhi: *«haddii aad wax weydiisan, Ilaahay weydiiso*[3]»

Maadaama oo ay ku hayso baahi u baahan su'aal, cidda aad gacmaha hoos hoorsanaysaa ha noqoto Ilaahay oo keliya.

Waxaan la dhacay war uu *Abu Xaamid Al-Qasaali* ka soo tebiyey qofka ka mid ah dadka Alle-yaqaanka ah oo ka hadlayey magaca Alle ee weyn: *«qalbigaaga ka saar asaaggii, kadibna ku bari magac walba, waa uu kaa aqbalayaaye.»* Kani waa macnaha *al-Samad.* Alle SWT, haku weynaado qalbigaaga, kadibna dheh wax kasta oo wanaagsan, wuxuu noqondoonaa shay uu raalli ka yahaye. Dhib kasta oo kugu dhacaa waa dhambaal ku leh: *«Rabbi ayaad leedahay ee hoosgal.»* Xanuunku waa dhambaal xagga Alle kuu jiidaya. Baahidu waa farriin ku leh: *«u sujuud Ilaahay.»* Tamardarradu waa farriin ku leh: *«awood ka raadso Allaha awoodda leh.»* Nolosha oo dhami way kugu qaylinaysaa, waxaanay ku leedahay: *«Rabbi ayaad leedahay, ee isaga isku dhiib.»*

[3] Tirmidi ayaa ku soo saaray sunankiisa (2516-4/667)

Xadiiska Ibnu Cabbaas ee aynu soo xusnay Rasuulku NNKH waxa uu ku yidhi: *«Ilaali Ilaahay, waa uu ku ilaaline. Alle Ilaali, hortaada ayaad ka helaysaaye*[4]*.» Hortaada!* Ilaali naftaada, xubnahaaga iyo dareennadaada, waayo hortaada waxa noqon doona *ilaalintiisa, la jirkiisa iyo guushiisa oo is-huwane*. Qalbiyada addoomuhuna ma xasilaan ilaa ay iska xaadiriyaan catabadaha irridaha Allaha boqorka ah.

## Tallaabooyin

Fiiri dhan kasta, laakiin qalbigaaga u samee laba indhood oo aan fiirin waxaan ahayn weynida Alle. Ka sheekee waxaad doonto, laakiin qalbigaaga dhexdiisa ka yeel carrab aan ku dhawaaqin waxaan ka ahayn xuska Alle. Dhegayso dadka oo dhan, laakiin ka samee qalbigaaga dhexdiisa maqal aan dhegaysan waxaan ka ahayn hadalka Rabbi. Aad meesha aad doonto, laakiin ka dhex qod qalbigaaga tallaabooyin ku idlaada carshiga boqorka. *Qalbigaaga, ruuxdaada, fekerkaaga, jidhkaaga, rabitaankaaga, riyooyinkaaga iyo humaagyadaada* u hoggaami Rabbi SWT.

Marka aad qabsato qallinka, isweydii: *waxa aan ku qoridoonaa warqaddani ma raalligelinayaa Alle?* Haddii aad doonto in aad ku hadasho eray, isweydii: *hadalkaygu ma raalligelindoonaa Ilaahay?* Haddii aad meel istaagto, isweydii: *istaagaygan ma jecel yahay Ilaahay, mise waa maya?*

Samayso baraarujiye, kadibna ka laalaadi qalbigaaga, halhayskiisuna ha noqdo: *muxuu Alle doonayaa? Muxuu Alle doonayaa? Muxuu Alle doonayaa?* Daqiiqad kasta, irko Alle, saqda

[4] Tirmidi ayaa ku soo saaray sunankiisa (2516-4/667)

dhexe marka aad baraarugtana xus, maxaa yeelay humaagyadaadu waa mugdi haddii aanad xasuusan. Garaadkaagu waa kharaab, haddii aanad xasuusan magaca Alle, riyooyinkaaguna waa biyo fadhiisinno wasakhaysan. Haddaba, amminta aad biyo fadhiisinnadan ku dhex xusto Allaha nool ee aan dhimanay, ayay isu rogayaan wabiyo, dhir iyo shimbiro heesaya.

## Sarrayn

Goorta aad barto ruuxdaada irkashada Rabbi, muddo kadib waxa ay ka xishoon doontaa raadinta baahiyaha adduunka. Sababta oo ah ifku ma aha hoygaaga dhabta ah, yoolashaada oo dhanna waa in ay noqdaan aakhiro.

Hoggaamiyihii Muslimiinta ayaa ku yidhi Ina Cumar oo ku wareegayey Kacbada: *wax i weydiiso*. Ina Cumar oo ay ka muuqdaan qabka iyo kalsoonida uu ku qabo Rabbi ayaa ku yidhi: *«ma arrin adduun, mise mid aakhiro?»* Hoggaamiyihii ayaa ku yidhi: *«aakhiro miyaa, Ilaahay baa iska leh, balse arrimaha aduunka wax iga weydiiso.»* Ina Cumar ayaa ku yidhi: *«adduunyada ma weydiisan ka iska leh, ee sidee baan u weydiistaa mid aanay waxba gacmaha ugu jirin!»*

Irkashada Alle, waxa ay kaa dhigaysaa shakhsi weyn oo aan u aabbeyeelin ilma Aadan. Adduunyadu waa takhasus aanay isku mashquulin kuwa miciinbida Eebbohood. Boqor baa ku yidhi Ibnu Teymiya: *«waxaannu maqalnay in uu hunguri kaa hayo kursigayaga.»* Ibnu Teymiya ayaa kor u qaaday madaxiisa isaga oo ay ka muuqato isla-weyni iyo sarrayni, waxaanu ugu warceliyay boqorkii: *«Ilaah baan ku dhaartay ee boqortinimadaadu agtayda kama*

*aha laba shilinna.» Nin habeenkii oo dhan foolkiisa u bandhigaya Alle, sidee ayuu maalinkii naftiisa ugu dullaynayaa gobol dhaldhalaal ah!?*

## Xaqiiqo

Ilbidhiqsiga aad baahidaada u bandhigato Alle, waa ka aad gacanta ku dhigayso baahidaada. Wanaag oo dhan waxa lagu gaadhaa jidka Alle. Baahi kastana waxa lagaga baxaa baryadiisa. Shayna ma dhaco la'aantii. Waayo xeelad iyo xoog ma jiraan la'aantii. Unug ma dhaqaaqi karo, atom ma jiri karo, dhibic biyo ah ma uumi bixi karto, caleenna kama soo dhici karto geed ogolaansho la'aan. Dunida oo dhami ma awooddo in ay ku gaadhsiiso xumaan aanu kula doonin. sidoo kalena kaama celin karto xumaan uu kuu qorsheeyay! Haddaba, dhankiisa u jeedi foolkaaga, ku tiiri dhabarkaaga, arrinkaagana u dhiibo. Alle, waa ma baahda loo wada baahan yahay, ma uu dhalin, lamana dhalin, sidoo kalena ma jiro wax u dhigmaa.

*Eebboow, xaggaaga u jeedi qalbiyadayada, nagana dhig kuwo aan wax weydiinsan qayrkaa, isla markaana aan gargaar bidin cid aan adiga ahayn.*

# الْحَفِيظُ

*«Waynu xasuusannaa dheefaha walaxda ka hortagta simbiririxada, xakameeyaha xawaaraha, kondhomka iyo suunka badbaadada, Allena waynu iska illaawaynaa!»*

# AL-XAFIID (ILAALIYE)

Haddii aad dareento in ay halis ku jirto noloshaadu. Haddii aad dareento in xanuun faro ba'an kugu hayo, ama uu ilmahaagu kaa jiro dhul dheer, isla markaana aad uga baqayso limid, ama in uu la xidho saaxiibbo xun. Haddii aad ka cabsi qabto in aad kacdo, ama ay yaraato hantidaadu, ogow waxaad u baahan tahay in aad barato magacyada Rabbi in uu ka mid yahay *al-Xafiid* iyo in ay kugu habboon tahay in aad u baahan tahay magacan weyn in aad ku cusboonaysiiso iimaankaaga iyo ugu dambayn in uu yimid wakhtigii munaasibka ahaa. Sidaas awgeed, waxa waajib ah in aad dhuuxo oo dhugato magacan. Keligii (Alle) ayaa ilaaliya: *noloshaada, caafimaadkaaga, carruurtaada, hantidaada iyo wax kasta oo ku dhex sugan noloshan!*

## Qalbiyohow Xasil

Sh. Cabdiraxmaan as-Sicdi AHN waxa uu yidhi: *«Xafiid waa ka ilaaliya waxa uu abuuray. Waa ka aqoontiisa ku koobay waxa uu jirsiiyay. Waa ka ka dhowra awliyadiisa dambiyada iyo halaagyada, sidoo kalena waa ka u tudhaya tallaabo kasta oo ay qaadayaan.»*

Heerka ugu dambeeya ilaalinta Rabbi, yoolka ugu weyn naxariistiisa iyo figta ugu sarraysa xasilloonidu la jirkiisa ayay ku imanayaan. Ilaahay, addoonkiisa ayuu ilaaliyaa. Sidaas darteed ayaynu si joogto ah ugu ducaysannaa: *«Allahayoow ii ilaali hortayda, gadaashayda, midigtayda, bidixdayda iyo oogadayda, sidoo kalena waxaan kaa magangelayaa in la ila jaro dhulka.»* Alle, ayaad weydiisanaysaa in uu kuu ilaaliyo jihooyinkaaga lixda ah. Waxaad ka codsanaysaa in

uu kugu wareejiyo ilaalintiisa, cid aan isaga ahaynna ma awooddo arrinkaas! Araggaaga iyo maqalkaaga ayuu ilaaliyaa Rabbi. Sidaa awgeed, ayaynu ugu ducaysannaa maalinka labadiisa gellin: *«Allahayoow, ii ilaali maqalkayga, Allahayoow ii ilaali araggayga.»*

Haddii aad beesho dhegaha iyo indhaha, runtii waxaad waayidoontaa habdhiska aad ku fahmayso caalamkan. Sidoo kale, waxaad ku noolaan doontaa kelinimo iyo mugdi. Dunidan oo dhamina cidhiidhi ayay kugu noqon doontaa! Rabbi weyne waxa uu yidhi:

﴿قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَخَذَ ٱللَّهُ سَمْعَكُمْ وَأَبْصَٰرَكُمْ وَخَتَمَ عَلَىٰ قُلُوبِكُم مَّنْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ يَأْتِيكُم بِهِ﴾ [الأَنْعَام : ٤٦]

*«Waxaad tidhaahdaa: ka warrama haddii uu Alle qaato maqalkiinna iyo araggiinna, qalbiyadiinnana daboolo, waa kuma Ilaaha aan isaga ahayn ee idin siinayaa!»*

Rabbiga xafiidka ah ayaa kuu ilaaliya dhegaha aad ku dhegaysanayso xumaanta iyo indhaha aad ku daawanayso xumaanta, haddii uu doonana ilbidiqsigan ayuu kaa qaadi karaa. Alle, ayaa kuu ilaaliya diintaada, sidaa darteed ayaad sujuudda dhexdeeda ugu faqdaa: *«Ilaaha qalbiyada iyo aragyada gedgediyoow, qalbigayga ku sug diintaada.»*

## Hillimmada Habowga!

Alle, haddii aanu qalbigaag ku sugin diintiisa, waxa u soo baratimi lahaa shubahaadka, waxaana dafi lahayd hawadaada. Aqoonyahanno noloshooda ku idlaystay kutubta iyo mixraabyada masjidka, ayaan Alle u dhowrin caqiidadooda. Rabbi, ayay ka

gaaloobeen, badhkoodna diinta ayay ku soo dareen qodobbo cusub (bidco). Adiga oo aan lahayn aqoon badanna wali waad u sujuudaysaa. Allaha xafiidka ah ayaa kuu ilaaliyey diintaada! Aqoonyahanka *Cabdillaahi al-Qasiimi*[5] waxa uu qoray kitaab uu ku difaacay diinta suubban ee Islaamka oo lagu magacaabo: " الصراع بين الإسلام والوثنية ", *loollanka u dhexeeya Islaamka iyo diin la'aanta.* Iyada oo lagu talaxtegayo qoraaga iyo shaqada uu qabtay baa laga yidhi kitaabkan: *«waxa uu ku sii bixiyay meherkii jannada!»* Sidoo kale, waxa laga ammaanay minbarka Xaramka. Sannado kadib, waxa soo garaacay qalbiga sheekhan dabaylaha habowga -Alle ayaynu ka magangalnaye-, waxaanu hoy iyo gabbaad u noqday aragtiyaha gurracan! Arrimihii diinta ee aasaasiga ahaa ayaa u noqday wax laga gudbi karo, xaqiiqooyinkuna aragtiyo ayay isugu beddeleen. Ugu dambayntiina qallinka ayuu u qaatay buug uu ku weeraray Islaamka oo lagu magacaabo: "إن دين الله آصار وأغلال وقيود", *Diinta Ilaahay waa culayso iyo dabarro!* Eebbe, waxa aynu ka magangelaynaa guuldarro!

Rabbiga xafiidka ah ayaa kuu xifdiya diintaada, balse kuma ilaaliyaan xogaha ku kaydsan maskaxdaadu. Haku dagmin aqoontaada, kitaabka Alle ee aad qaybsan tahay iyo sunnadda suubbanaha ee korkaaga ka muuqata. Ilaah baa aan ku dhaartay ee waad lumidoontaa haddii aanu xafiidku kuu dhowrin diintaada.

---

[5] **Cabdillaahi Al-Qasiimi (1907dii-1996dii):** waxa uu ahaa mufakir Sucuudi ah oo lagu tirinjiray mufakiriintii Carabta ee muranka weyn abuuray, sababta oo ah sidii uu u ahaa salafi difaaca diinta Islaamka ayuu mar keliya isu beddelay Mulxid dagaal ba'an ku qaaday isla diintii uu darteed dedaalka badan u bixiyey.

Kanina waa *Balcaam binu Cawraa*[6] oo uu Rabbi siiyay magaciisa weyn si uu ugu baryo xilliga uu doono, kadibna uga aqbalo. Magacan weyni kama hor istaagin in uu lumo, waanu halaagsamay.

**Alle ayaynu illaaweynaa!**

Alle, ayaa ilaaliya noloshaada. Sidaa awgeed, waxaynu ku sii sagootinnaa kuwa aynu jecelnahay marka aynu ka tegayno: *«waxa aan kaaga tegayaa Allaha aanay lumin wixii lagu aamminaa.»* Suuragal ma aha in ay lumaan waxyaabaha aad ku aammintay Alle, waayo wuu ilaalinayaa. Shil kasta oo uu ka badbaado qof, Allaha xafiidka ah baa ka badbaadiyey. *Waynu xasuusannaa dheefaha walaxda ka hortagta simbiririxada, xakameeyaha xawaaraha, kondhomka iyo suunka badbaadada, balse Ilaahay ayaynu illaaweynaa!*

Goorta ay duufaannadu garaacaan doonta, qalbiyaduna ay soo gaadhaan kalxamaha; kuma ayaa ka ilaaliya doonta in ay liqdo badweyntu?! Waxaan daawaday muuqaal laga duubay doon ay ciyaarsiinayaan hirarku. Dadka fuushan doontani hadba dhinac ayay u dheellinayaan. Talo way ka haadday gacmohooda, ma fekerayaan, waxa ugu badan ee ka dhex guuxayaana waa in ay meel uun ku dhegaan. Markii dusha lagaga qabtay kamaradda, waxaan arkay doontii oo inta ay qurub-qurub u kala googo'day ay sitaan hirarku. Wadihii diyaaradda ayaa ogaysiis ku bixiyay in ay jirto

---

[6] **Balcaam binu Cawraa:** Maalik binu Diinaar oo ka hadlayay baa yidhi: «Balcaam, waxa uu ka mid ahaa culimadii reer banii Israa'iil, sidoo kalena waxa uu ahaa nin Alle baryadiisa aqbalo oo ay tolkii dhankiisa u cararaan marka ay arrimuhu ku adkaadaan. Nebi Muuse ayaa u diray boqorkii Madyan, balse ammintii uu u tegay ayuu boqorkii siiyey xoolo, kadibna diintii boqorka ayuu qaatay, Muusena waa uu ka gaaloobay.»

cillad. Dadkii uu qof kastaa ku fooganaa danihiisa ayaa mar qudha isdhiibay. Dhammaantood Alle ayay magangaleen, waanay towbadkeeneen. Waxa ay illaaween filashooyinkii, riyooyinkii iyo xasuusihii ka dhex guuxayey. Shayga qudha ee u muuqdayna wuxuu ahaa dhimasho. Waa kuma ka hagaajiyay diyaraddan si ay u degto iyada oo badqabta, dadkii saarnaana ay caafimaad qabaan?!

Diyaarad aan raacay baa dhexgashay daruuro iskugu jira dabaylo iyo siigo aad u daran. Ilbidhiqsigan, waxaan si xeeldheer u dareemay weynida mugga diyaaradda iyo sida ay ammintan u dulsabbaynayso lama degaan fidsan. Cabsi xooggan baan dareemay, sidoo kalena waxa igu soo dhacday sidii aanan hore ugu baraarugsanayn socdaalladaydii hore humaagyadan cabsida leh ee ku socda awoodda Ilaahay!

ندعوه في البحر أن ينجي سفينتنا فإن وصلنا إلى الشاطي عصيناه

ونركب الجو في أمن وفي دعة فما سقطنا لأن الحافظ اللـــــــه

*Badda ayaynu ku dhexbarinnaa in uu badbaadiyo doonteenna, goorta aynu gaadhno xeebtana waynu caasinaa. Hawada sare ayaynu u socdaalnaa innaga oo amni iyo raaxo ku sugan, mana soo dhacno, waayo ilaaliyuhu waa Ilaahay.*

## Malaa'igta iscidhbisa

Ilaahay SWT waxa uu yidhi:

﴿لَهُۥ مُعَقِّبَٰتٞ مِّنۢ بَيۡنِ يَدَيۡهِ وَمِنۡ خَلۡفِهِۦ يَحۡفَظُونَهُۥ مِنۡ أَمۡرِ ٱللَّهِۗ﴾ [الرَّعۡد : ١١]

*"Insaanka, waxa lagu daray malaa'ig iscidhbinaysa oo hore iyo gadaalba ka jira, isla markaana u ilaalinaya amarka Ilaahay."*

Adiga dartaa buu Allaha xafiidka ahi u sameeyay afar malag oo gaadh kaa haya, isla markaana kaa ilaaliya qorshayaasha aanu kuu qorin. Sidee ayaanu Ilaahay xafiid u ahayn isaga oo kuu wakiishay tiradan malaa'igta sharafta leh ah si ay kaaga horjoogsadaan rasaas kasta oo dhaawaci lahayd jidhkaaga, dhagax walba oo ku dili lahaa iyo kaneeco kasta oo maqaarkaaga u geysan lahayd dhib aan laguu qorin!

Waxaan daawaday muuqaal argagax leh oo laga duubay shirqoolkii lagu doonayey in lagu dilo sheekh *Caa'id al-Qarani* oo ku sugnaa Filibbiin. Amakagaag ayay igu noqotay qaabka uu dambiiluhu meel aad ugu dhow sheekha, ugaga soo toogtay lix rasaasood. Dhanka kale, ma jirin teed u dhexeeyay sheekha iyo rasaasta. Dambiiluhuna waxa uu u muuqday qof xariif ku ah adeegsiga hubka, mana jirin wax iska caabbin ah oo kaga timid xagga sheekha iyo ciddii la socotay. Sheekhu waa uu ka badbaaday isku daygan dil. Dhanka kale, waxaan xasuustay sidii ay rasaas keliya oo laga soo riday meel aad u durugsani u dishay madaxweynihii Maraykanka ee *John Kandy*, kaas oo saarnaa gaadhi socday, isla markaana ay ku hareeraysnaayeen kolanyadii waardiyeynaysay iyo ciidamo kale! Sheekhu waxa uu sheegay in uu Alle xusayay, sidoo kalena uu soo akhristay ducooyin. Dhacdadani waa cashar dhammaystiran. Maya ee waa buug ka kooban cutubyo kala duwan oo ka hadlaya macnaha *al-Xafiid.*

## Laba Qaws dhexdood

Ma og tahay in Alle ku ilaaliyo ilbidhiqsi walba? Ilbidhiqsi kasta boqolaal jeer baa uu ku ilaaliyaa Alle! Laakiin sidee? Ilbidhiqsigan aad akhriyayso qoraalkan u dhexeeya (labadan qaws), waxa uu kaa ilaaliyey *wadne-istaag, aroorayaasha oo ku awdma, neerfahaaga oo baaba'a, boogo kaa soo baxa caloosha, walamadka oo ku barara, faalig, indho la'aan, dhego la'aan iyo ammuumenimo.* Intaa iyo in ka badan buu kaa ilaaliyay ilbidhiqsigan. Waanay sii soconaysaa ilaalintaasi ilbidhiqsiga kan xiga. Imisa jeer ayay waajib tahay ilbidhiqsigii in aynu dhahno: "الحمد لله" «*Mahadsanid Allahayoow!*»

## Quraarad

Goorta aad meel madow dhigto gaadhigaaga adiga oo uga cabsanaya tuugta; ka codso xafiidka in uu kuu ilaaliyo, waayo wixii loo dhiibtaa way ilaashan yihiin. Haddii aad ka baxdo guriga adiga oo ubadkaaga u baqaya, dheh: *«Waxaan idinkaga tegayaa Allaha aanay dayacmin wixii loo dhiibtaa.»* Ogolaanshaha Alle kadib, waxa aad soo noqondoontaa iyaga oo ku sugan xaaladda ugu wanaagsan. Sababta oo ah, Alle waa ilaaliye. Dantu marka ay kugu qasabto in aad walax qiimo leh kaga tagto meel aan ammaan ahayn, qalbigaaga u jeedi xagga Alle, adiga oo leh: *«Allahayoow, ilaali»,* kuna kalsoonow in ay kormeerayso isha Ilaahay ilaa aad u soo noqonayso.

Afar wiil oo saaxiibbo ah baa tegay meel u jirta *Tabuuk* 60km oo lagu magacaabo *Nicmatu-Rayd.* Sagaalkii aroornimo ayay ku dhaadheceen goob lagu magacaabo *as-Shaq* iyaga oo lugaynaya. As-Shaq, waa god weyn oo ku yaalla dhulka, gelitaankiisuna waa isbiimayn iyo khamaar! Afartan wiil, halista iyo isbiimaynta oo ay jeclaayeen baa ku dhalisay in ay hoos ugu daadegaan godkan. Saacad

badhkeed kadib, ayay gunta soo taabteen, deedna halkaas ayay joogeen ilaa gabbal-dhicii. Waxa ay isku deyayeen in ay ka soo baxaan meeshan khatarta ah. Dhagaxaanta ayay qabsanayeen, sallaxyada ayaa la siisiibanayey, dabaqadaha dhagaxaanta ah ayaa halis gelinayey, meelo badan oo khatar ahna way soo dhex jibaaxeen. Daal iyo diif baa ka muuqday, gommadahaa qarqarxay, halis ayay galeen, harraad daran baa soo food saaray, warka oo koobbanna wadka ayay isa sigeen! Qalbiyadoodu Alle ayay ku xidhnaayeen. Waxay aamminsanaayeen ilaaliye aan Alle ahayn in aanu jirin. Mid ka mid ah raggan ayaa sheegay in uu aad u baryey Rabbi markii uu harraad dartii u dhiman gaadhay. Meel aan waligeed qof cagta saarin ayuu ku arkay quraarad biyo saafi ah! Kuma uu farxlin biyaha ay wadaageenisaga iyo saaxiibbadii, balse waxa uu la dhacay Rabbiga la jiray ilbidhiqsigan adag. Wuxuu guddoontay Ilaaha quraaraddan biyaha ah siiyay ilbidhiqsigan halista ah, in uu awoodo in uu ka badbaadiyo socdaalkan khatarta leh. Quraaraddani ugama ay dhignayn badbaado, laakiin waxa ay u ahayd ilaalinta Rabbiga xafiidka ah. Waxyar ka hor qorrax dhicii ayay soo gaadheen oogada sare ee godka. Foolashooda ayaa madoobaa, dharkooga ayaa jeexjeexnaa, iimaankooguna wuxuu u dhigmay buurihii ku hareeraysnaa.

سهرت أعين ونامت عيون — في شؤون تكون أو لا تكون
إن ربا كفاك ما كان بالأمس — سيكفيك في غد ما يكون

*Indho ayaa ku dhafray, kuwana way ku seexdeen arrimo jira iyo kuwo aan jirinba. Rabbiga shalay kugu fillaaday, barrina waa uu kugu fillaandoonaa.*

## Ka weyn oo ka badan

Magaca xafiid, qof kasta noloshiisa waxa uu ku leeyahay sheeko. Eebbe, inta uu uumay addoomihiisa faraha kama qaadin,

balse waxa uu siiyay hubka ugu fiican ee ay kaga hortegayaan kadisooyinka noloshan. Noole walba waxa uu ku hubeeyay seef u qalanta dagaalka uu gelayo. Qayb ka mid ah xayawaanka, waxa uu ku ilaaliyaa carar sida: *garanuugta iyo bakaylaha*. Jaad kale, waxa uu siiyay geeso ay ku dooxaan cid kasta oo u soo dhowaata sida: *jeerta iyo lo'dibadeedda*. Duul kale, waxa uu ka dhigay kuwo jidh ahaan u waaweyn, noole kasta oo soo doontana waa ay jiidhan sida: *maroodiga iyo madax-kutida*. Kuwo kale, waxa uu ku hubeeyay koronto halis gelinaysa wixii u soo dhowaada sida: *faanuuska badda*! Jaadad ka mid ah xayawanka, ayuu ku hubeeyay sun ku dhex kaydsan jidhkooda sida: *masaska iyo dib-qallooca*. Jirjirrooluhu waxa uu awoodaa in uu beddelo midabkiisa xilliga uu u baahdo. Qaar baa duula, kuwo kale, ayaa dhakrid badan, halka ay kuwo seddexaadna fantaan dhirta. Qaybahani waxa ay ka mid yihiin ilaalinta Ilaahay. Inta aynaan garanayn ayaana ka weyn oo ka badan!

## Wuu Kugu Difaacayaa

Humaagyada xifdinta Alle, waxa ka mid ah in uu Mu'miniinta ku tirtiro baadilka. Ilaahay SWT, waxa uu ku yidhi Quraanka kariimka ah:

﴿۞ إِنَّ ٱللَّهَ يُدَٰفِعُ عَنِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ﴾ [الحَج : ٣٨]

*«Alle, waxa uu ku difaacayaa xaqa iyo diinta kuwa rumeeyay.»*

*U fiirso;* Mu'miniinta kama difaaco sharka, balse wuu ku difaacaa! Qodobkani waa farriin inna tusaysa halista shayga ay la kulmidoonaan, qaababkiisa kala geddisan iyo humaagyadiisa kala duwan. Hase yeeshee, Alle, isaga ayaa u ogaal badan waxa karaar

jabinaya cadowgiisa, deedna wuu ka difaacayaa oo ka celinayaa kuwa uu jecel yahay. Xadiis Qudsiga waxa ku jirtay:

"من عادى لي وليا فقد آذنته بالحرب."

*«Qofka colaadiya wali aan leeyahay, dhab ahaantii dagaal ayaan ogaysiiyey*[7]*.»*

Bal sawiro dagaal u dhexeeya cadowga dacwadda, xaqa, diinta iyo Ilaahay SWT! Ayaa guulaysanaya? Ayaa se guuladarraysanaya? Kuma ayaa hoogaya? Ilaahay SWT, addoomihiisa rumeeyay waxa uu xifdiyaa xifdin gaar ah oo ay ku dheehan yihiin : *jacayl, u tudhid iyo naxariisi*. Mushrikiintii Qureysheed ayaa isku hor urursaday god ay ku jireen laba nin: Muxammed NNKH iyo Abu Bakar RC. Duulkan, waxa dabada ka riixayey hantidii la duldhigay labadan qof si loo dilo, xumaantii ay u hayeen iyo in qof kastaa ka fekerayay sidii uu ugu guulaysan lahaa billad-sharafeedda.

Cabsi baa dhex xushay qalbigii Abu Bakar, deedna saaxiibkiisii weynaa ayaa soo fiiriyey oo ugu laabqaboojiyey: *«maxaad u malaynaysaa laba uu seddex ku yahay Ilaahay! Abu Bakaroow, ma waxay kula tahay in aynu laba nahay? Maya, seddex ayaynu nahay! Abu Bakar waxa ka baaba'day cabsidii iyo murugadii!»*

وإذا العناية لاحظتك عيونها        نم فالمخاوف كلهن أمان

*Marka ay ilaalintu indheheeda kugu ilaaliso, iska seexo, waayo ammaan ayaad haysataaye.*

Kuwani waa dhalinyartii godka. Rabbi SWT, ayay maganelayaan oo ay weydiisanayaan hanuun, isna waxa uu geliyey god bilaa irrid ah. God u furan dadka, dugaagga iyo bahalahaba. Hase yeeshee, Alle ayaa doonay in uu ilaaliyo. Jaad ka mid ah

---

[7] Xadiiskan Bukhaari baa ku soo saaray saxeexiisa (6502-8).

ciidamadiisa oo cabsida ah ayaanu u diray! Qof kasta oo u soo dhowaada godkani, wuxuu dareemayay cabsi, deedna gadaal ayuu u guranayay. Rabbi SWT, waxa uu yidhi:

﴿لَوِ ٱطَّلَعۡتَ عَلَيۡهِمۡ لَوَلَّيۡتَ مِنۡهُمۡ فِرَارٗا وَلَمُلِئۡتَ مِنۡهُمۡ رُعۡبٗا ١٨﴾ [الكهف : ١٨]

*«Haddii aad arki lahayd, cagaha ayaad wax ka dayi lahayd, cabsina way ku buuxin lahayd.»*

Labadeennu, haddii aynu doonno in aynu wax tuurno; qalin, buug ama dhagax ayaynu tuurnaa. Laakiin, Rabbi halka uu doonayo in uu wax ku gano, waxyaabo layaab iyo weyni leh ayuu ku tuuraa. Rabbi baa yidhi:

﴿سَأُلۡقِي فِي قُلُوبِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ ٱلرُّعۡبَ﴾ [الأنفال : ١٢]

*«Waxaan ku tuuridoonaa qalbiyada kuwa gaaloobay cabsi.»*

Ilaahay SWT, addoomihiisa iyo awliyadiisa dartood, ayuu qalbiyada gaalada ugu tuuraa cabsi iyo argagax, kadibna waxay ka firdhadaan awliyadiisa.

## Dooxii Dugaagga

Eebbe, waxa uu kugu ilaaliyay malaa'ig. Haddaba, qofka akhrista aayadda *kursiga* hurdada ka hor; Alle ayaa u dira malag joogaya madaxiisa oo ka waardiyeynaya wax kasta oo aanu u qorin. Haddii uu Ilaahay kula jiro, ayaa kale ee aad ka baqanaysaa?! Magacani waxa uu kaa dhigayaa qof jecel in uu kor u qaado laabtiisa isaga oo kalsooni buuxda ku qaba Rabbiga nool ee aan dhimanayn.

Mugdiga ayaad dhex socon, dooxyada dugaagga ayaad ka gudbi, biyo fadhiisinnada hoyga u ah yaxaasyadu ayaad dhex quusi, kadibna Allaha xafiidka ah baa kugu hareerayn ilaalintiisa. Noolayaashanna waxa uu kaaga dhigayaa agabka ay ku dheelaan dhallaanku. Haa, arrinkani kama soo horjeedo qaadashada sababaha, waayo waa la inna faray. Tusaalena waxa innoo ah Nebiga NNKH oo la yimi hijradiisii, duullaannadiisii iyo maalmihiisii oo dhan. Sababtu waa mihiim, Allena qalbigaaga ayuu ku ahaanayaa mid ogaal, awood iyo ilaalin badan.

Qofka akhrista sheekada *Sh. Cabdiraxmaan as-Samiid* AHN iyo socdaalladii uu ku gaalaa bixiyey Afrika si uu ugu faafiyo diinta iyo qaabkii uu u dhex muquurtay biyo-fadhiisinnada iyo dooxyada cabsida leh ee ku yaalla qaaraddan madow, isla markaana uu ugu dhex gaajooday, ugu harraaday, uguna dhex xanuunsaday, waxa u soo baxaysa in aanu soo gaadhin wax dhib ahi. Shan iyo labaatan sannadood ayuu ku taagnaa jidkii caddaa ee uu u cugay naftiisa, kadibna Kuwayt buu ku dhintay isaga oo jiifa sariirtiisii! Qofka akhrista sheekada *as-Samiid*, waxa uu baranayaa macnaha *al-Xafiid*.

Dadka qaar baa wariyey war aan la hubin, balse wax lala yaabo aan ahayn, kaas oo kasuurooba addoomaha Ilaahay ee wanwaagsan. *Saciid binu Jubeer* ayay soo qabteen laba askari oo ka mid ah ciidankii Xajaaj. Xilli ay sii hayeen jidka ayuu ku hooray roob, waxaanay ka galeen teendho uu lahaa wadaad Kiristaan ahi. Siciid, wuu ka gows adaygay in uu galo teendho lagu caabudo cid aan Alle ahayn. Dhulka ayay kaga tegeen, iyaguna dusha sare ayay fuuleen. Waxyar kadib, libaax ayaa inyar u soo jirsaday Siciid. Raggii waday ayaa qayliyay iyaga oo ku leh: *waar meesha iskaga carar*. Siciid ma dhaqaaqin, hase ahaatee waxa uu isku mashquuliyey

caalamka xuska Alle. Libaaxii ayaa aad ugu soo dhowaaday Siciid oo waxa la mooday in uu dhegta wax ugu sheegayo, kadibna waa uu iskaga tegay. Labadii askari oo ay ka muuqdaan argagax iyo cabsiyi, ayuu soo fiiriyey wadaadkii, waxaanu ku yidhi: *kani waa wali ka mid ah awliyada Ilaahay!*

خذوا دنيالكم واتركوا فؤادي حرا طليقا غريبا

فإني أعظمكم ثروة وإن خلتموني وحيدا سليبا

*Qaata aduunyadiinna oo iiga taga qalbigayga oo xor ah. Aniga ayaa idiinku hanti badan xataa haddii aad iska kay sii daysaan aniga oo keli ah, balse dhacan.*

Ayaa joojiyey libaaxa ilbidhiqsigii ugu dambeeyay? Allaha xafiidka ah!

## Waan baahanahay

You Tubeka ayaan ka daawaday muuqaal argagax leh oo laga duubay nin ka tallaabaya jid tareen. Mushkiladda jirta ayaa ah in tareenku ku soo dhowaa ninkan, xoogna uu u socday. Isaguna waxa uu ku tashaday in uu haysto wakhti ku filan oo uu ugu gudbi karo dhanka kale. Si aan ku talagal ahayn ayay lugtiisu u dhexgashay labada birood ee uu ka samaysan yahay jidka tareenku. Ninkii waxa uu isku deyay in uu lugta kala baxo, balse way ku adkaatay. Tareenkiina kaabiga ayuu ku hayay. Ninku waa uu qaylinayaa, dhimasho ayuu qarka u saaran yahay, cabsi badanna waa uu dareemayaa. Goortii ay isaga iyo tareenka u dhexeeyeen

dhawr mitir ayuu kala baxay lugtii, si degdeg ahna u tallaabay. Runtii ninkani wuu sigtay!

Ku kalsoonow tamadarradaada, ku kalsoonow aragtidaada weyda ah, ku kalsoonow baahidaada, kadibna ku xidh qalbigaaga Alle, kuna celceli:

أنا الفقير إلى رب البريات          أنا مسيكين في مجموع حالاتي

*Waxaan u baahanay Allaha abuuray noolayaasha. Miskiin yare ayaan ahay xaaladahayga oo dhan.*

Nebi Luud CS ayay tolkii soo weerareen gurigiisa iyaga oo doonaya in ay fara-xumeeyaan malaa'igtii martida u ahayd. Maxaa ka ceeb badan dambiilayaasha tolkaa oo dhib u geysanaya martidaada! Luud CS isaga oo dareemaya tamadarro oo dhan ayuu ku cataabay:

﴿لَوۡ أَنَّ لِي بِكُمۡ قُوَّةً أَوۡ ءَاوِيٓ إِلَىٰ رُكۡنٖ شَدِيدٖ ٨٠﴾ [هُود : ٨٠]

*«Haddii aan lahaan lahaa awood, ama aan ku tiirsanaan lahaa tiir adag.»*

Nabigeenna CSW oo faallo ka bixinaya hadalkii Luud baa yidhi:

"يرحم الله لوطا، لقد كان يأوي إلى ركن شديد."

*«Alle ha u naxariisto Luud e, dhab ahaantii wuxuu ku tiirsanaa tiir adag[8].»*

الزم يديك بحبل الله معتصما          فإنه الركن إن خانتك أركان

*Ku dheg xadhiga Ilaahay, maxaa yeelay waa tiir haddii ay kuwada khiyaamaan tiirarkuye.*

[8] Xadiiskan Bukhaari iyo Muslin ayaa ku soo saaray saxeexyadooda.

## Maandhoow!

Dhanka kale, Alle waxa uu kaa dhowraa cadowgaaga, laakiin sidee? Waxa la yidhi tuug baa galay guri. Tuuggii waxa uu doonaya in uu alaab ka xado qol ay ku jireen labadii waalid iyo ilmohoogii yaraa. Haddaba, tuuggii intuu galay qolkii huradada ayuu ilmihii u qaaday qol kale. Ilmihii baa qayliyey, kadibna labadii waalid oo argagaxsan, isna weydiinaya waxa dhacay ayaa ka kacay hurdadii. Waxa ay bilaabeen in ay ilmihii ka dhex raadiyaan guriga. Tuuggii oo ka faa'iidaysanaya fursaddan dahabiga ah ayaa galay qolkii hurdada, balse wuu ku dumay! Haddaba, ayaa keenay tuuggan si uu qoyskan uga badbaadiyo dhimasho? Allaha xafiidka ah ee dhowra addoomihiisa ayaa keenay. Xataa cadowgoodii ayuu ku ilaaliyay! Sababaha ugu waaweyn ee keena ilaalinta Alle, waxa ka mid ah; in aad ilaaliso isaga! Ku celceli oo u fiirso xadiiskan:

"يا غلام إني أعلمك كلمات: احفظ الله يحفظك، احفظ الله تجده تجاهك، تعرف إلى الله في الرخاء يعرفك في الشدة."

*«Maandhoow, waxaan ku barayaa weedho: ilaali Ilaahay, wuu ku ilaalinayaaye. Ilaali Ilaahay, hortaada ayaad ka helaysaaye. Baro Ilaahay wakhtiga barwaaqada, waxa uu ku baranayaa xilliga dhibaatada e.[9]»*

Alle, ilaali wuu ku ilaaline. Ilaali amarradiisa oo u samee siduu ku faray. Iska jir waxa uu kuu diiday oo uga tag siduu kaa doonayo.

## Cidhiidhi

Warku waa sida aynu soo xusnay. Intaa kadib, iska sarraysii cabsida iyo murugda ku haya. Waayo, Ilaahay SWT ayaa kuu badbaadinaya siduu u samatabixiyay *Danuun binu Mataa*. Ma jiraan

[9] Xadiiskan waxa soo saaray Tirmidi iyo Axmed, Al-Baanina waxa uu ku saxiixiyey kitaabka Al-Tawasul.

murugo, tiiraanyo iyo dhib u dhigma kuwii haleelay Yoonis CS markii uu ku dhex jiray seddexdii mugdi: *mugdigii badda, kii habeenka iyo kii caloosha Kalluunka.* Maxaa ka xun oo ka liita nolol aad waligaa ku qaadanayso calool kalluun, mugdi, cidhiidhi iyo neef-qabatow! Dhibaatooyinkan oo dhan waxa meesha ka saartay weedh keliya:

لا إله إلا أنت سبحانك إني كنت من الظالمين

*"Ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo adiga mooyaane, adiga ayaa ka hufan xumaan, aniguna waxaan ka mid ahay dulmifalayaasha.»*

Xuruuftan taagta daran ayaa fanatay xagga sare, waxaanay sii dhex jibaaxeen mugdigii caloosha kalluunka, kii badda iyo kii habeenka, deedna samada ayay fuuleen. Waxa la wariyay in ay maqashay malaa'igtu, kadibna tidhi: *«Eebboow, kani waa cod la garanayo, hase ahaatee ka imanaya meel aan la garanayn.»*

Waxa yimid farajkii, ilaalintii iyo cafiskii. Kalluunkii ayaa ku tuuray badda xeelligeeda, Allena waxa uu u soo saaray geed ka mid ah dhirta maranta ah. Dhammaanteen waxaynu nahay Dannuun oo kale. Noloshu way inna hiiftaa, waxa keliya ee aynu ku badbaadaynaana waa:

لا إله إلا أنت سبحانك إني كنت من الظالمين

*Eebboow, nagu dhawr ilaalintaada, na daaqsii xannaanayntaada, sidoo kalana ka yeel hortayada, gadaashayada, midigtayad, bidixdayada, oogadayada iyo hoostayadaba ilaalin ka ahaatay xaggaaga oo aad nagaga badbaadinayso waxa aannu ka baqanayno, kana digtoonnahay.*

# اللَّطِيفُ

*«Tudhid badanuhu haddii uu doono in uu kaa leexiyo xumaan, kuma tuso ama kuma garato, ama waa aad kala dhacdaan oo dhib kuma soo gaadho!»*

# AL-LADIIF (TUDHID BADANE)

Ma leedahay yoolal fog oo aad gaadhi kari weyday? Dhakhtarradu ma ka dayriyeen xaaladda caafimaad ee xigtadaada? Ma dareemaysaa quus, illayn waxaan isku sargo'nayn shaqadaada iyo waxa kaa dhex guuxaya e? Haddii ay arrimuhu sidan yihiin, kaalay aynu baranno magaca Alle ee *al-Ladiif* oo marka aad u fiirsato daaha lagaaga feydayo in aanu jirin waxaan suuragal ka ahayn noloshani, in Alle karo wax kasta, iyo riyooyinkaagii u muuqday waxaan dhacayn in ay rumoobayaan amminta aad si dhab ah u garaacdo irriddaha Allaha *ladiifka* ah (tudhidda badan).

## Tudhaalayaasha Qarsoon

Af ahaan, *al-Ladiif:* waa ka u samafala addoomihiisa, waana ka wanaagga u sameeya makhluuqaadkiisa, una gaadhsiiya wixii ay dani ugu jirto hab ay ku dheehan yihiin dhibrin iyo tudhidi. Waxaad odhanaysaa: "لطف الله لك", oo ah: «*Alle, si tudhaale leh, ha kugu gaadhsiiyo muraadkaaga.* Erayga *al-Ludfu*, asal ahaan waa jid dahsoon iyo hilin xeeldheer. Eebbena, samihiisa si tudhid leh ayuu ku gaadhsiiyaa qofka ay aqoontiisu gaadho arrimaha xeeshadheer iyo nafaha qarsoon. Eebbe, waa ka ugu samafala addoomihiisa hab

dahsoon iyo meel aanay garanayn. Sidoo kale, sababaha xamaalashada ayuu ka siiyaa meel aanay ka filayn. Rabbi, marka uu samaynayo maamuus iyo samafal, marka uu ilaalinayo ama uu hanuuninayo addoonkiisa iyo xilliga uu wax qorayo ama qorshaynayo, waa ka ehelka u ah: *tudhidda, qarsoonaanta iyo xeeldheeraantaba.*

In kasta oo ay xeeldheer tahay awooddiisu, in kasta oo ay weyn tahay aqoontiisu, aanu arko addoomihiisa, haddana waxyaabaha uu ku koobo addoonka ee ah *hanuun, maamuus iyo samafal;* waxa ka muuqda tudhiddiisa iyo naxariistiisa.

Sedadkiisu[10] kedo kuguma noqdaan, laakiin waxa ka horreeya dabaylo bishaaro sida, qalbigaagana Alle waxa uu u diyaariyaa sidii uu u soo dhowayn lahaa. Marka ay kugu soo degaan galladaha Rabbi, sababihii ka horreeyay ayuu uga dhigaa hordhac oo waxa aad mooddaa shay ku yimid dhididka addoonka. Dhab ahaantiina waa maamuus badhax la' oo ka yimid Allaha ay galladihiisa iyo siismooyinkiisu weyn yihiin. Tudhidda Alle, waxa ku hirgala maqaadiirta waaweyn ee ay dhicitaankooda fogaystaan badi caqliyadu. Eebbe, ayaa ka dhiga wax jira oo jooga. Dun kasta oo maqaadiirta ka mid ahi waxa ay haysataa tudhiddiisa, waxaanad ku baraarugtaa uun marka ay hortaada timaaddo. Ma garanaysid qaabka u dhacday. Sidoo kale waxaad garwaaqsanaysaa in aanad lahayn xoog iyo xeelad aad ku samayso. Samada ayaad fiirinaysaa, waxaanad odhan*:*

[10] Sed: waxa la wadaago qaybta qof waliba gooni uga hela hayo. (Qaamuuska Yaasiin C. Keenadiid)

﴿ٱللَّهُ لَطِيفُۢ بِعِبَادِهِۦ﴾ [الشُّورَى : ١٩]

*"Ilaahay, aad ayuu ugu tudhaa addoomihiisa."*

## Neecawda Tudhidda

Haddii uu doono Allaha ladiifka ahi in uu kaaga hiiliyo arrin, sabab yaab leh ayaa uu keenaa! Allaha ladiifka ahi haddii uu doono in uu ku maamuuso, qof aanad waligaa wanaag ka filayn ayaa noqda sababta ugu weyn ee aad ku gaadhayso! Tudhuhu haddii uu guddoonto in uu kaa leexiyo xumaan, kuma tuso, ama kuma garato, ama waad kala dhacdaan oo dhibba kuma soo gaadho! Addoomaha Alle, tudhiddan ayay quudarraynayaan. Araggooda ayay ku fiiriyaan, wax kasta oo ku dhacana isaga ayay ka dhex arkaan.

Allaha ladiifka ahi ammintii uu doonay in uu xabsiga ka saaro Yuusuf CS, ma dildillaacin darbiyadii xabsiga, ma farin malag in uu nafta ka saaro dulmifalayaashii, samadana kama soo dejin qaylo xididdada u siibta albaabadii iyo qufulladdi xadiidka ahaa. Laakiin, keliya boqorkii ayaa ku riyooday riyo qarsoon oo sabab u noqotay in silsiladihii dulmifalaayaasha laga furo Yuusufkii runta badnaa!

Wakhtigii Alle doonay in uu Muuse u celiyo hooyadii, ma dhicin dagaal ay kacdoon wadayaashii reer banii Israa'iil kaga hortegeen qooqii Fircoon oo ay ku soo ceshanayeen sharaftoodii hore, balse afkii Muuse ayaa diiday in uu jaqo caanihii dumarka kale. Falkan qarsoon ayaa Muuse ku celiyey dhabtii hooyadii murugo kadib!

Ammintii uu doonay ladiifku in uu suubbanaha iyo ciddi la jirtay ka saaro cadaabkii iyo laagtii reer bani Haashim; ma soo dirin

qaylo gilgishay Qureysh, balse keliya waxa uu soo diray aboor cunay heshiiskii gardarrada iyo xadgudubka ahaa. Qureysh ayaa waabariisatay gardarradii qaawanayd oo uu cunay noole aanay arkayn!

| | |
|---|---|
| لغيرك ما مددت يدا | وغيرك لا يفيض ندى |
| وليس يضيق بابك بي | فيكف ترد من قصدا |
| وركنك لم يزل صمدا | فيكف تذوذ من وردا |
| ولطفك يا خفي اللطيف | إن عادي الشرور عدا |

*Cid aan adiga ahayn gargaar ma weydiisan, qayrkaana lama burqadaan deeqsinimo. Irriddaadu cidhiidhi iguma aha, ee sidee ayaad uga celinaysaa qofk kuu yimid! Tiirkaagu wali waa uu adag yahay, ee qaabkee ayaad uga difaacaysaa qof ku soo arooray! Tudhaalkaagu waa mid qarsoon, haddii uu sharku i colladiyana waa kii collaadiya.*

Ilaahay waa tudhid badane, arrimaha ugu sahlan ayaanu ku qaddaraa maqaadiirta ugu waaweyn. Doonistiisu waxa ay ku dhammaystirantaa waxa uu doono, addoonkiisuna kuma baraarugsana in ay wax dheceen.

## Dhagax

Waad seexanaysaa, kadibna Alle ayaa jeclaanaya in aad kacdo oo aad hortiisa ku tukato salaad. Waxa uu soo diraa laydh deggan oo dhaqdhaqaajinaysa daaqaddaada. Ama wiil qoyska ka mid ah baa inta uu soo hor maro qolkaaga qaylinaya, ama biyo ayaad aad ugu baahanaysaa; kadibna inta aad kacdo ayaad fiirinaysaa saacadda. Daqiiqado kooban kadib, inta aad ku istaagto sijaayadda ayaad la faqaysaa Rabbigaa. Mana ogid in uu isagu ku toosiyey!

Gadhigaaga ayaad u kaxaysanaysaa buuraha dhaadheer. Si degdeg ah ayaad uga baxaysaa waddada si aad u hubiso in uu shay kaaga dhex dhacay gaadhiga sida: *baasaaborkaagii ama shandadaadii lacagta*. Daqiiqado kooban kadib, waxaad arkaysaa dhagax weyn oo

ka soo shalwanaya buurta dusheeda. Haddii aanad ka joogi lahaynna laguma arkeen. Socdaalkaaga ayaad sii ambaqaadaysaa adiga oo badqaba, mana ogid in Rabbi ku badbaadiyey! Macsi ayaad qorshaynaysaa oo habeen ayaad baxaysaa. Qorshe dhammasytiranna waad dejisanaysaa. Si kedo ah ayuu meel fog gaadhi kaaga soo baxayaa. Bac baa kugu xidhmaysa, waxaanad is odhanaysaa: wallee waa lagaa warhayaa. Gaadhigani waxa uu kala kicinayaa qorshihii aad wadatay. Waad xasilaysaa, gurigaagii ayaad iskaga noqonaysaa, mana ogid in Ilaahay kaa joojiyey!

وكم لله من لطف خفي　　يدق خفاه عن فهم الذكي
وكم أمر تساء به صباحا　　فتأتيك المسرة في العشي
إذا ضاقت بك الأحوال يوما　　فثق بالواحد الفرد العلي

*Badanaa tudhid qarsoon oo u sugnaatay Alle, taas oo ay dahsoonaanteedu garaacayso fahanka qofka maskaxda badan. Badanaa arrin aad dhibsatay maalinka gelinkiisa hore, balse aad ku faraxday gelinkiisa dambe. Haddii ay xaaladuhu kugu adkaadaan maalin uun, ku kalsoonow Allaha kelida ah ee sarreeya.*

## Arrimaha Dahsoon

Waa lama huraan Allaha ladiifkii in uu yahay ogaal badane. Haddii aanu astaantan lahayn, qaabkee baa uu kuu maamuusayaa?! Sidee ayuu kuu milgaynayaa? Sidee ayuu hab ay ku dheehan tahay tudhidi, kuugu hanuuninayaa mid aan ka warqabin waxyaabaha qarsoon? Sidoo kale, waa in uu Alle noqdaa abuure, maxaa yeelay dhammaystirka samafalku waxa uu keensanayaa in la jirsiiyo, ama la abuuro waxaan hore u jirin. Kuwani waa magacyada iyo astaamaha Alle oo isxoojinaya. Sidoo kale, qaarba qaarka kale ayay dhammaystirayaan. Eebbe weyne waxa uu yidhi:

﴿يَعۡلَمُ مَنۡ خَلَقَ وَهُوَ ٱللَّطِيفُ ٱلۡخَبِيرُ ١٤﴾ [المُلْك : ١٤]

*«Miyaanu ogayn ka abuuray isaga oo ah tudhe xogogaal ah.»*

Sidee ayaanu u ogayn iyada oo ay aqoontiisu gaadhay in uu qariyey siintiisa, kadibna ay noqotay mid ay xeeldheer tahay joogitaankeedu, mid deggan oo iftiimaysa iyo mid uu dareenkeedu layaab yahay! Ka warran Rabbiga sida daboolan wax-u-maamuusaya. Rabbiga qaabka hoose wax u hanuuninaya, sida qarsoonna wax u leexiya! Miyaanu ogayn Alle, guud ahaan tudhaallada uu samaynayo?

Sheekh *as-Sicdi* ayaa yidhi: *«Ilaahay waa tudhaha ay aqoontiisu hareeraysay waxa maqan iyo waxa aan la arkayn, sidoo kalena waxa uu ka warqabaa waxyaabaha qarsoon iyo kuwa dahsoonba.»*

Tani waa riyo ka mid ah kuwa ugu waaweyn ee uu arkay Yuusuf xaalad aanay suuragal ahayn in ay dhacdo. Yuusuf, riyadii ayaa uu uga warramay aabbihii Yacquub, waxaanu ku yidhi:

﴿إِنِّي رَأَيْتُ أَحَدَ عَشَرَ كَوْكَبًا وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ رَأَيْتُهُمْ لِي سَٰجِدِينَ ٤﴾

*"Waxaan arkay kow iyo toban xiddig iyo qorraxda iyo dayaxa oo ii sujuudaya."*

Fasirka riyadu waa in ay aabbihii, hooyadii iyo kow iyo tobankiisa walaal u sujuudidoonaan iyaga oo huwinaya maamuus iyo qadarin! Si guud, saadaaluhu waxa ay tibaaxeen riyadani in aanay suuragal ahayn. Waayo aabbihii waxa uu ahaa nebi maamuusan oo ay iskugu biireen da' iyo sharafi. Sidii dhaqanka ahaydna maangal ma ahayn in qof weyni maamuuso mid ka yar. In uu nebi sharfo qof caadi ah iyo in aabbuhu milgeeyo wiilkiisa. Walaalihii way necbaayeen, ee sidee ayay ugu sujuudi? Nacaybku waxa uu ka gaadhay heer ay qorsheeyeen dilkiisii. Mar kalena waxa uu ku riixay in ay ku tuuraan ceel guntii.

Dhacdooyinkani waxa ay sheegayeen in aanay sinaba maangal u ahayn sujuuddani! Xaaladihii oo dhan baa mar qudha isbeddelay.

Yuusuf waxa lagu tuuray ceel guntii. Intaa kadibna, waa la iibiyay oo boqorkii Masar baa ka dhigtay bidde[11]. Addoonnimadani filashadii riyada Yuusuf ayay geed baarkii ku laashay, waxaana sii kala fogaaday masaafadii u dhexaysay Yuusuf iyo riyadiisa. Balse, Allaha tudhidda badan baa qorsheeya qadarrada, isaga ayaana gedgediya arrimaha. Yuusuf ayaa uu ka soo saaray jeelkii. Xilsare ayaa uu siiyay, abaaro baa dhacay, walaalihii oo baahi la bayhoofaya ayaaan u yimid. Eebbena wali wuxuu waday qorshihii uu ku rumaynayey riyada. Yuusuf oo la yaabban sujuudda ayaa yidhi:

﴿يَـٰٓأَبَتِ هَـٰذَا تَأۡوِيلُ رُءۡيَـٰيَ مِن قَبۡلُ قَدۡ جَعَلَهَا رَبِّي حَقّٗاۖ﴾ [يُوسُف : ١٠٠]

*"Aabbe, kani waa fasirka riyadaydii hore, dhab ahaantiina Rabbigay ayaa rumeeyay."*

Haddii aanay jiri lahayn doonsita Rabbi, ma rumowdeen riyadani. Yuusuf ayaa mar kale yidhi:

﴿وَقَدۡ أَحۡسَنَ بِيٓ إِذۡ أَخۡرَجَنِي مِنَ ٱلسِّجۡنِ وَجَآءَ بِكُم مِّنَ ٱلۡبَدۡوِ مِنۢ بَعۡدِ أَن نَّزَغَ ٱلشَّيۡطَٰنُ بَيۡنِي وَبَيۡنَ﴾ [يُوسُف : ١٠٠]

*"Dhab ahaantii, Alle ayaa ii samafalay ammintii uu iga soo saaray xabsiga, idinkana idinka keenay miyiga kadib markii uu dhexdayada kharribay shaydaanku."*

Yuusuf waxa uu yidhi:

﴿إِنَّ رَبِّي لَطِيفٞ لِّمَا يَشَآءُۚ﴾ [يُوسُف : ١٠٠]

*"Rabbigay waa uu u tudhaa cidda uu doono."*

[11] Bidde: nin xornimadii laga qaaday, oo sida xoolaha oo kale qof kale gacantii ku jira (addoon). Qaamuuska Yuusuf C. Keenadiid.

Alle (SWT), haddii uu doono shay, si hoose oo dadan ayuu ugu diyaariyaa sababaha hirgelinaya, ujeedkuna waa si aan loo moodin wax aan dhacayn. Maxaa yeelay, Alle waa tudhe iyo xogogaal badane!

## Riyooyinkii Fogaa

Haddii ay dhaayahaagu qabtaan dhul omos iyo abaar ah, kadibna uu ku hooro roob oo uu isu rogo cagaar aragga u roon; ha odhan waa arrin dabiici ah, balse dhuux macnaha aayaddan Quraanka ah:

﴿أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَتُصْبِحُ ٱلْأَرْضُ مُخْضَرَّةً ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٌ ﴿٦٣﴾﴾ [الحج : ٦٣]

*"Miyaanad arkayn in Ilaahay samada ka soo dejiyey biyo, kadibna dhulku noqonayo cagaar. Alle waa tudhid badane xogxogaal ah."*

Si kasta oo ay u fog yihiin riyooyinkaagu, masaafo dheerina idiinku dhexayso, Allaha ladiifka ah baa keenaya. Rabbi SWT waxa uu ku yidhi:

﴿يَٰبُنَيَّ إِنَّهَآ إِن تَكُ مِثْقَالَ حَبَّةٍ مِّنْ خَرْدَلٍ فَتَكُن فِى صَخْرَةٍ أَوْ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ أَوْ فِى ٱلْأَرْضِ يَأْتِ بِهَا ٱللَّهُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٌ ﴿١٦﴾﴾ [لُقْمَان : ١٦]

*"Maandhoow, falka aad samaysay haddii uu yahay xabbad sagaro-xuur ah, oo ay ku dhex sugan tahay dhagax, cirarka ama dhulka, Ilaahay waa uu keenaya; waayo waa tudhid badane xogoxgaal ah."*

Ha quusan madaama oo uu Rabbigaa yahay ka u tudhaya shayga uu doono. U fiirso xabbadda sagaro-xuurka ah! Ma

arkaysid haddii aanad indho fiiqnayn. Fiiri muggeedu inta uu kaga dhaco baabacadaada, qolkaaga, gurigaaga, xaafaddaada, magaaladaada iyo dawalddaada. Sidoo kale, barbardhig qaaradda aad ku nooshahay iyo dhulkan iyo cirarkan ballaadhan, deedna ku kalsoonow haddii uu Alle doono in uu keeni karo.

﴿ وَهُوَ ٱللَّطِيفُ ٱلۡخَبِيرُ ١٤ ﴾ [المُلْك : ١٤]

Allaha xabadda *sagaro-xuurka* ah ka soo dhex qabanaya kownkan weyn, miyaanay suuragal ahayn in uu kuu ksiiyo - *dhammaan hordhacayaasha muuqdaa kuma soo gaadhsiinayaan, kumana tusayaane-* waxa aad u baahan tahay? Dhab ahaantii, haa.

Saaxiibkay ayaa socdaal dheer oo uu kaga soo kicitimay Tabuuk ku gaadhay xuduudda Urdun. Sababtuna waa in uu barri subax casharro ku lahaa jaamacadda Mu'ta. Markii uu gaadhay xuduudka, isla markaana uu soo jaray 100M, ayaa uu xasuustay in uu guriga kaga yimi basaboorkiisii! Wuu dhibsaday, waxaanu go'aansaday in aanu socdaalin todobaadkan. Maalinkii xigay ayaa uu wargeysyada ka akhriyey in ay qayb ka mid ah ardayda jaamacadda oo ka soo kala jeeda waddamo badani ay sameeyeen gacan-ka-hadal keenay dhaawac. Allaha ladiifka ah ayaa soo illowsiiyay basaboorkiisa. Xikmadda ku jirtaana waa si aanu u arag dhiig, si aanu u soo gaadhin dhaawac iyo si aanu u dareemin cabsi, kadibna faraha uga qaadin wax-bariddii uu u soo jarijiray masaafada dheer! U fiirso tudhidda Alle, dhab ahaantii waxa aad arkaysaa iyada oo kuugu da'aysa sida roobka oo kale. Ilbidhiqsi walba tudhaha iyo xogogaalka wanaagiisa ayaa ku hareeraynaya.

## Tudhidda ilbidhiqsigii ugu dambeeyay

U fiirso marka aad gasho qolkaaga ilbidhiqsiga uu ilmahaaga yari iska soo tuurayo sariirta, isna weydii: *waa maxay sababta aad qolka u soo gashay daqiiqaddani?* U fiirso maalintii aad gashay madbakha, si aad uga cabto biyo. Isla markiiba waxaad aragtay fiishtii tallaagadda oo qiiqaysa, waanad bakhtiisay. *Isweydii: ayaa daqiiqaddan ku soo geliyey madbakha? Maxaa aad ugu dib-dhiciweyday shan daqiiqo oo keliya*? Arrimahan oo kale, haddii aanay kugu dhicin, waxa suuragal ah in ay ku soo mareen kuwo u dhow ee fasax xasuustaada waxa kugu soo dhicidoona tudhaallada Alle ee buuxdhaafiyey noloshaada.

Kadib dhuuxiddii deggan ee aynu ku samaynay magacan Alle ee weyn, kaas oo aynu waxyar ka taataabannay; inta badan ee aan ka tegay waxa aan u dhaafayaa fahankaaga, dhuuxiddaada iyo hadba dedaalka aad ku bixiso baadhidda kutubta culimada. Kadib dhugashadan, miyaanu xaq u lahayn tudhuhu in aad jeclaato? Miyaanu xaq u lahayn in aad u fiirfiirsato siintiisa? Miyaanu xaq u lahayn in ay qalbigaaga ku weynaadaan xuskiisa, iska jirkiisa, rajayntiisa iyo cabsidiisu? Miyaanu xaq u lahayn in aad maalmo la noolaato magacan, in aad ku barido iyo in aad fiirfiiriso tudhaalladiisa tiiyoo ay indhahaagu hayaan hadiyadihiisa iyo hanuunnadiisa?

Si khushuuc leh u dheh: *Allaha ay tudhaalladiisu qarsoon yihiinoow, naga badbaadi wixii aannu ka baqanayno. Allaha tudhaha ahoow, noo naxariiso, noo tudh, sidoo kalena nooga qorshee tudhaalahaaga iyo*

*naxariistaada wax aad ku toosiso qalloocayaga, shay aad ku hanuuniso baadidayada iyo mid aad ku qurxiso noloshayada.*

# الشَّــا

# فِي

*“Sabab la’aan ayuu ku bogsiiyaa. Sababta ugu liidata ayuu kugu bogsiiyaa. Sababta ugu layaabka badan ayuu*

*kugu bogsiiyaa. Sidoo kale, shay aan u muuqan sabab ayuu kugu bogsiiya, ama sabab la'aanba!"*

## ASH-SHAAFI (BOGSIIYE)

Ma ku dishootay gaajo? Ma ku daaliyeen xanuunno? Maadaama oo uu cudur kugu raagay, ma ka quusatay nolosha? Ma kahatay goobaha caafimaadka? Ma dhibsataa jidadka loo maro dhakhtarrada, sidoo kalena ma iskaga kaa dhexyaceen magacyada dhakhtarrada iyo maalmaha aad buuqataa? Haddaba, ka warran haddii aan ku tuso shay ka maydhaya ruuxdaada dhibkii iyo xanuunkii soo maray? Waa magaca Rabbi ee *ash-Shaafi*. U ogolow naftaadan rafaadday in ay qaadato hawo yar, kadibna ay akhrido magacan wada naxariista ah, magacan haddii aad badsato aad ogaanayso heerka baahida aad u qabto iyo masaafada aad ka durugsan tahay!

### Maanta kadib, ma jiro xanuun

Magacyada aynu ugu mahadcelinno Alle SWT, waxa ka mid ah *ash-shaafi*. Alle, waxa aynu uga mahadnaqaynaa in uu isku bixiyay magacan, in uu isku asteeyay bogsiiye iyo in uu keligii bogsiiyo

addoonkiisa buka. *Ash-shaafi,* waa magac ka turjumaya macnihiisa dhabta ah. Sidoo kale, waa magac ay ku qarsoon yihiin dhexdiisa siro badani. Bogsashadu xidhiidh toos ah ayay la leedahay xanuunka. Maxaa yeelay, xanuunku waa shaacsane si joogto ah ugu soo laalaabta nolosha insaanka, kaas oo leh humaagyo kala geddisan oo aan nafna seegin. Qofka uu u badqabo araggu, madaxa ayaa xanuunaya, marka uu ka bogsado madax-xanuunkana, kala goysyada ayuu ka cawdaa. Haddii uu ka kaco xummad baa qabanaysa, amminta uu ka bogsadana gowska ayaa garaacaya. Halkaas uun ka sii ambaqaad. Ma jirto maalin uu qofku ka madhan yahay xanuun. Marka uu caafimaado, waxa uu arkaa walaalkii oo taahaya, hooyadii oo ooyaysa, wiilkiisa oo baaxaadegaya, ama jacaylkiisa oo qandhoonaysa. Noloshu waa beerta xanuunnada, macaluusha iyo dhibaatooyinka. Sidaas awgeed, ayuu Ilaahay iskugu bixiyey bogsiiye, ujeedkuna waa in aad xanuunnadaada kula ciirto mixraabka naxariistiisa iyo catabadda awooddiisa.

Xanuunku waa fadeexad weyn oo lagu karbaasho insaanka kibray! Xanuunku waa  tamardarro degdeg ah oo uu qofku ku lumiyo ubixiisii. Docda kale waa musiibo ku habsata insaanka isku darsaday gacan adaygga iyo sina-kuma-roonanimada. Ilaahay, waxa uu u qadaray jidhka insaanka, in uu si ku meel gaadha u waayo bilicdiisii si uu u qarwaaqsado tamadarradiisa iyo in aanu lahayn tab iyo taagtoona. Ilaahay, sababta uu qofka ugu qadaray xanuunku waa in uu xasuusiyo shay metela xalaaddan uu ku jiro oo ah dhimashada! Sida uu xanuunku xididdada ugu siibo quruxda qofka, ayay dhimashaduna u tahay dhammaadka noloshan. Insaanyohow, adiga iyo wed waad is hurran tihiin, waxaana kugu

dhex sugan wax u eg dhimashada. Hurdadaada iyo xanuunka kugu dhacayaa waa dhimasho yar. Heerarka nololeed ee aad iskaga gudubtaa waxa ay sumad u yihiin dhimashada xaaladihii ka horreeyay. Tusaale: dhallinyarnimada iyo gadhmadoobanimadu waxay summad u yihiin dhimashada heerarkii ka horreeyay. Gabigaaguba waxaad meteshaa dhimaasho. Sidaas oo ay tahay, haddana ismoodsiisku waxa uu inaga dhigaa kuwo aamminsan in ay ku waarayaan noloshan. Sidaas darteed, xanuunku waxa uu u diraa jidhkeenna dhambaal uu nuxurkiisu yahay waad tegaysaa!

Amminta uu bukaanku jiifo sariirta, jidhkiisa daallan baa arka dadka u soo gelgeaya iyo kuwa ka sii baxaya oo madaxa ku sita taajka caafimaadka. Xilliga uu ku jiro xaaladdan, waxa uu ku soo baraarugaysa xasuusta ciidda, waxaana buuxinaysa urta qabriga - ha dareemo ama yaanu dareemine! Xaaladda aad xanuunsanayso, kulammo ay albaabadu u xidhan yihiin ayaad la gashaa geerida. Indhahaaga iyo dibnahaaga waxa ka muuqda barbilowga baaba’a noloshaada, addimadaada qaboobina way gariiraan. Waa tan noloshaadii oo sii sagootinaysa kuwa ku soo buuqanaya.

Goorta uu kugu fido xanuunku, nolosha adduunna aad quus ka istaagto, ayuu Allaha bogsiiyaha ahi u ogolaanayaa dawadu in ay saamayn ku yeelato jidhkaaga. Sidoo kale, waxa uu farayaa in caafimaadkaagu ku soo noqdo sidiisii hore. Waaba midabkii bilicda samaa oo ku soo laabanaya foolkaaga. Sidoo kale, waxa soo noqonaysa dhoollacaddayntii aad kala irdhowdeen maalmihii kaarka iyo kulaylka.

## Sabab la’aan buu kugu bogsiiyaa!

Alle, sabab la'aan buu kugu bogsiiyaa. Sababta ugu liidata ayuu kugu bogsiiyaa. Sababta ugu layaabka badan ayuu kugu bogsiiyaa. Sidoo kale, waxa uu kugu bogsiiyaa shay aan u muuqan sabab, ama sabab la'aanba! Waxa uu kugu bogsiiyaa dhirta, dawo keliya, kuwo la isku dardaray iyo cuntada iyo cabbitaanka.

Sheekooyinka ugu cajiibsan ee aan akhriyey waxa ka mid ah wiil ay ku dheceen TB iyo xanuunno kale, ayay dhakhaatiirtu sheegeen in ay dhowdahay dhimashadiisu. Hooyadii dhashay wiilka ayay u fasaxeen maalmaha kooban ee ka hadhay noloshiisa in ay geyso miyiga, si uu ugu sii raaxaysto hawada nadiifta ah iyo muuqaallada qalbiga dafaya ee dabiiciga ah. Wiilkii oo socda, gacantana uu ku sita keeg ayay kulmeen oday duq ah. Odaygii intuu fiiriyey indhihiisii sii libdhayay ayaa uu weydiiyey: *wiilkaygiyoow, ma doonaysaa nolol?*

Wiilkii oo madaxa ruxaya ayaa ugu warceliyey: haa. Odaygii ayaa ku yidhi: *sidee ayaad nolol ku helaysaa adiga oo quuta cunto dhimatay?!* Waxa aad quudataa cuntada nool, hilibka iyo khudaarta iyo shay kasta oo Alle ku uumay arladan, kaas oo wali laga sii dareemayo diirrimaadka ciidda iyo raadka nolosha. Wiilkii ayaa yidhi: si dhab ah baan u qaatay taladan, mana cuni jirin cunto aan noolayn sida: *jaadadka kala duwan ee hilibka, khudaarta, roodhida diirran iyo khudradda markaa bislaatay*. Wiilkii waxa uu yidhi: xaaladdaydii caafimaad baa soo raysay, jidhkaygiina waa uu soo noqday oo aabbahay ayaa igu celiyay dhakhtarkii. Kadib baadhsiyo ay u qaadan waayeen dhakhaatiirtii, waxa soo baxday in aan bogsaday.

Sheekadan waxa mariyey wiilkii ay ku dhacday markii uu weynaaday, isla markaana uu ka mid noqday dadka ugu caansan

dunida ee bukaanka ku daweeya dhirta iyo cuntooyinka. Ninkani waa aqoonyahan *Gayelord Hauser*, sheekadanina waxa ay ku jirtaa buuggiisa: "الغذاء يصنع المعجزات" *Cuntadu mucjisooyin ayay samaysaa.* Haa, dhakhaatiirta ayaa ku xukumay geeri, balse boqorka boqorradu kuma xukumin dhimasho. Haa, dhakhaatiirta ayaa ku taliyey in uu ku allaysto miyiga, laakiin Ilaahay sidaas ma doonin! Haa, dhakhaatiirta ayaa ka dayriyey xaaladdiisa caafimaad, hase yeeshee Ilaahay kama dayrin, kamana dayrindoono.

## Ma Garanaysid!

Waa kuma ka siraha caafimaadka dhex dhigay khudaarta, hilbaha iyo dhirta kala geddisan ee ay quutaan ragga ugu saboolsan dunidu?! Waa Allaha bogsiiyaha ah! Waxa suuragal ah in uu ku hayo xanuun, balse aanad garanayn, isla markaana aad quudanayso cuntada uu ku jiro caafimaadkaagu adiga oo aan ku baraarugsanayn. Waad xanuunsataa, waanu ku bogsiiyaa adiga oo aan ka warqabin xanuunkaaga iyo bogsiintaadaba. Eebbe SWT, biyaha waxa uu dhex dhigay caafimaadka, dhammaanteenna waxa aynu qaybsannahay xadiiskan:

"ماء زمزم لما شرب له" و "طعام طعم، وشفاء سقم."

*«Biyaha samsamku waa wixii loo cabbo.»* Iyo *«Waa cunto, xanuunkana dawo ayay ka yihiin[12].»*

Badanaa qof uu daashaday xanuun oo joogteeyay biyahan barakaysan, kadibna uu ku bogsiiyey Alle. Qofka u kuurgala xadiisyada ka hadlaya caafimaadku, waxa uu ka dhex helayaa

---

[12] Xadiiskan Ibnu Maaja iyo Dabaraani ayaa ku soo kala saaray sunanka iyo mucjamka yar.

dawooyin badan oo ka sugnaaday suubbanaha. Qaybo ka mid ahna *Ibnu Al-Qayim* ayaa ku ururiyey buuggiisa: "الطب النبوي".

Dawooyinkan waxa ka mid ah: *Qisdiga badda iyo ka hindiga (Cotus), caanaha iyo baruurta lo'da, sanna*[13]*, sanuut*[14]*, xabaasuudda, boorashka iyo salaadda habeenkii.* Arrimahan oo dhan, waxa ku soo arooray xadiisyo saxiix ah. Eebbe, dadka waxa uu ku bogsiiyaa: *adkaysiga, baryada, waxbixinta, istiqfaarta, towbadda, qanaacada iyo sabab la'aanba!*

## Ilayskii baa soo laabtay!

Xafiiska arrimaha diinta ee dhakhtarka boqor Cabdicasiis ee ku yaalla Tabuuk, waxa noogu soo galay nin uu foolkisu madow yahay, isla markaana ay ka muuqdaan murugo iyo xanuun. Ilbidhiqsigan ayaannu weyney farxaddii iyo dhoollacaddayntii ninkan. Waxaannu weydiinay: *maxaa kugu dhacay?* Waxa uu yidhi: wiilkaygii yaraa oo hurday dabaqa sare ayaa ka soo dhacay, waanu indha beelay! Waa xaalad xanuun badan. Bal maxaad u malaynaysaa xanuunka uu dareemayo qalbig aabbaha ay musiibadani ku habsatay?! Si filasho leh ayuu noogu yidhi: midkiin ha i raaco si uu ugu soo tufo Quraan, waxa suuragal ah in uu Alle bogsiiyo e. Saaxiibkay ayaa si dhakhso ah u kacay, waanu raacay. Saacad kadib, ayuu igu soo noqday saaxiibkay, waxaanu ii sheegay in uu ku soo tufay Quraan, isla markaana uu samirsiiyay aabbihii, xusuusiyeyna xadiiskan:

---

[13] **Sanna:** waa dawo dhireed ay adeegsan jireen reer Maka.

[14] **Sanuut:** waa dhir ka baxda bannaanka oo loo adeegsado dawo ahaan.

"داووا مرضاكم بالصدقة."

*"Bukaannadiina ku daweeya waxbixinta."*

Aabbihii inta uu jeebkiisa ka soo saaray shan boqol oo riyaal ayuu ku yidhi saaxiibkay sadaqadan u bixi si uu Alle bogsiiyo wiilkayga. Laba bari kadib, waxa nagu soo noqday aabbihii oo aad u faraxsan. Saaxiibkayna waxa uu ka codsaday in ay is raacaan. Saacad badhkeed kadib, waxa igu soo noqday saaxiibkay oo faraxsan, waxaanu igu yidhi: *wiilkii yaraa waxyar ayuu arkayaa!* Waxa kale oo uu sii raaciyey in aabbihii u dhiibay kun riyaal, si uu ugu sadaqeeyo. Maalinkani waxa uu ahaa dhammaadkii todobaadka. Sabtidii xigtay, saaxiibkay waxa uu ii sheegay in ay aabbihii isku raaceen qolkii uu ku jiray wiilka yari. Ma rumaysan markii uu ii sheegay in wiilkii yaraa sidiisii hore wax u arkayo! Dhab ahaantii, araggsii ayaa u soo noqday. Mar kale ayaanu arkay noloshan. Ayaa bogsiiyey? Indhihiisa ayaa mar kale u qoray nolol? Ayaa u soo celiyey araggiisii?

﴿إِنَّمَآ أَمۡرُهُۥٓ إِذَآ أَرَادَ شَيۡـًٔا أَن يَقُولَ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ٨٢﴾ [يس : ٨٢]

*"Arrinkiisu waa marka uu doono shay in uu ku yidhaahdo: ahow, kadibna ahaado"*

## U Noqo Xaggiisa!

Alle, kaama doonayo waxaan ahayn noqosho iyo in aad raadsato jidka kuu geynaya. Alle, ugu laabo: *qanaaco, sujuud, towbad, istiqfaar, waxbixin iyo qirasho.* Garaac irriddiisa, kadibna dhowr caafimaad. Ma jiro dhakhtar dunidan jooga oo ku bogsiin kara haddii aan Alle ku bogsiin. Lama soo helayo dhakhtar helaya cudurkaaga, haddii aan Alle doonin.

Nin hantiile ah ayay keliyi fadhiisatay. Ubadkiisii ayaa u qaaday dalka Masar, si loogu geliyo kelli kale. Wiilashii odayga ayaa kula heshiiyey qoys danyar ah oo reer Masar ah in ay kellida inantooda yar kaga iibsadaan boqol kun oo riyaal[15]. Subixii dambe ayaana la iskugu yimid dhakhtarkii. Haddaba, ka hor intii aanay bilaabmin hawshii kelli gelintu, ayuu odaygii codsaday in uu la kulmo inanta yar ee u saaraysa kellideeda. Si xishood iyo xushmad leh ayay ugu soo gashay odaygii, waxaanu weydiiyay: *adeer maxaa kugu riixaya in aad ka iibiso kellidaada duq siday oo kale ah?* Waxa ay ugu warcelisay: *baahi!* Qoyskaygu waa sabool, walaalahay jaamacadda ayay dhigtaana, anigana xil baa iga saaran! Hadalkani odaygii waxa uu ku noqday musiibo illowsiisay dhiiggii sunta ahaa ee ku socday jidhkiisa, waxaanu isweydiiyey: *suuragal ma tahay in qof ka maarmo qayb ka mid ah jidhkiisa, si uu u noolaado?!* Si degdeg ah ayuu u codsaday in loogu yeedho wiilashiisii. Markii ay u soo galeen, odaygii waxa uu faray in ay ku celiyaan Sucuucdiga, sababta oo ah waxa uu hakiyey hawshii uu u yimid. Sidoo kale, waxa uu faray in gabadhan yar la siiyo boqolkii kun ee riyaal! Kadib loollan adag oo ay badh ka mid ah ubadkiisu ka cadhoodeen, doonistiisii ayay u fuliyeen. Ammintii uu ku noqday Sucuudiga, sidii dhaqanka u ahayd ayuu ugu tegijiray dhakhtarkii u sifayn jiray kellida. Baadhis kadib, waxa soo baxday in ay shaqaynayso kellidiisii!

Awoodda uu wax ku bogsiiyo boqorka boqorradu, uma baahna qallin, waayo waa boqor oo xagga sare ayuu ka soo fiiriyaa addoomihiisa. Ilaahay SWT, qof buga ayuu bogsiiyaa, mid dhibban

---

[15] Boqol kun oo riyaal= $27,000.

ayuu ka farxiyaa, mid socdaalay ayuu soo celiyaa, mid dhaawacanna waa uu dhayaa!

## Ballan Hore

Alle, xanuun ayuu kugu ridayaa, si aad ugu soo noqoto. Amminta aad soo noqoto wuu kaa qaadayaa, waayo waxba kama dheefayo! Xanuun ayuu kugu sallidaa, si aad u dareento bukaanka kale. Xilliga aad dareento ayuu kaa qaadayaa, waayo waxba kama dheefayo! Xannuun ayuu kugu ridayaa, si uu u jirrabo adkaysigaaga iyo raalli ahaanshahaaga. Marka aad adkaysato, isla markaana raalli noqoto, ayuu kaa qaadaaa, sababta oo ah waxba kama dheefayo. Bogsiiyaha aan kugu xidhayn ballan hore, kaadh iyo ugu yaraan in aad soo dhakhsato rubuc saac waa Alle SWT. Keliya dheh: *Allahayoow*. Isla markaaba waxa kuu furmaya dhakhtarka ugu weyn oo ah *naxariis, awood, tudhid iyo caafimaad.*

Saaxiibkay ayaa iiga warramay in uu jiidhay wiil yar oo hoos fadhiyey taayirka gaadhigiisa. Saaxiibkay, gaadhigii ayuu istaajiyey, ilmihii yaraana dhakhtarka ayuu u qaaday isaga oo gariiraya. Dhakhtarkii waxa yimid aabbihii iyo awowgii wiilka yar. Saaxiibkay habeen kuma seexan ilme yar baad nolosha dhaafindoontaa! Sanqadhii lafaha jajabayay ayaa ku soo laalaabanaysay maqalkiisa! Awowgii wiilka yar ayaa u dhaqaaqay dhankii saaxiibkay, niyada ayuu u dhisay, waxaanu u sheegay in ay dhacayaan wixii Alle qoray, raallina ay ku noqondoonaan. Awowgii ayaa tukiyey masjidkii dhakhtarka salaaddii cishe, waxaanu akhriyey:

﴿وَبَشِّرِ ٱلصَّٰبِرِينَ ١٥٥﴾ [البَقَرَةِ : ١٥٥]

*"u bisheeree kuwa adkaysta."*

Saaxiibkay markii uu maqlay aayaddan, ayuu aad u ooyey. Markii laga baxay salaaddii cishe, ayay dhakhtarradii u sheegeen ehelkii nolosha wiilku in ay halis ku jirto, waayo waxa burburtay lafta madaxa! Saaxiibkay wuu miyirdoorsoomay. Isaga oo dawakhsan ayuu ku noqday gurigiisii. Toddobaad dhammaystiran ayuu ka maqnaa shaqadiisii! Ma jirin dawo la siinayay ilmahan laga quustay aan ahayn iimaanka awowgii, ducadii hooyadii, kolsoonidii aabbihii iyo guud ahaan qoyskiisa oo ku xidhnaa Ilaahay! Toddobaad kadib, waxaan buuqday ilmahan quruxda badan. Waaba isaga oo faraxsan, ciyaaraya, isla markaana nala sheekaysanaya! Eebbe, ayaa run sheegay, dhakhtarraduna way gafeen. Waxa run sheegay Allaha kaba lafaha jabay:

﴿مَّا يَفۡتَحِ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ مِن رَّحۡمَةٖ فَلَا مُمۡسِكَ لَهَا﴾ [فَاطِر : ٢]

*"Wixii naxariis ah ee Alle u furayo dadka, ma jirto cid hor istaagi karaysaa."* Kuma ayaa awooda in uu isu soo ururiyo lafaha kala tegay? Ayaa kara in uu ilmahan yar u soo celiyo farxaddiisii? Ayaa ruuxda ku afuufay jidhkii taagnaa irridda qabriga? Alle oo keliya ayaa awooda!

## Hoosta Ka Xarriiq

Kani waa aabbihii nebiyada, Ibraahin oo Rabbigii ula tegay qalbi ka badqaba wadaajinta (shirkiga) ugu yar ee gasha qalbi taagdaran oo leh:

﴿وَإِذَا مَرِضۡتُ فَهُوَ يَشۡفِينِ ٨٠﴾ [الشُّعَرَاء : ٨٠]

*"Markii aan bukoodo isaga ayaa i bogsiinaya."*

Muuminku casharkan ayuu fahmaa, mana magangalo cid aan ahayn Allaha nool ee aan dhimanayn. Rabbi oo keliya ayaa i bogsiinaya! Hadalkan hoosta ka xarriiq! Haddii uu doono bogsiintaada, uma baahnid cid kale, haddii uu diidana cid wax ku taraysaa ma jirto!

Hablo-baas baa baabi'isay jidhkii Ayuub CS. Qoyskiisii baa kala firdhaday. Hantidiisii ayaa luntay, qofkii arkaana waa uu u dardaarwerinayey xaaladdiisa, haddana waa uu adkaysanayay! Xanuunkii ayaa ka tanbatay, deedna hiiliyihiisa ayuu isu dhiibay. Kadib sannado uu la ildarnaa xanuun daran, duco nool ayaa ka soo baxday afkiisa, waxaanu ku ducaystay baryo ay ka muuqdaan isdullayn iyo kalsooni buuxdaa. Ayuub CS waxa uu ku ducaystay:

﴿أَنِّي مَسَّنِيَ ٱلضُّرُّ وَأَنتَ أَرۡحَمُ ٱلرَّٰحِمِينَ ٨٣﴾ [الأنبياء : ٨٣]

*"Dhib baa i taabtay, adiguna inta naxariisata ayaad ugu naxariis badan tahay."*

Waaba irridaha samada oo la furamay naxariis! Waaba amarrada sare oo ka soo degaya toddobada cir dushooda si dhibka looga saaro addoonkan kadeedan. Saacad keliya ayay ku dhammaadeen sannadihii badnaa ee hoogga iyo halaagga ahaa, waanu caafimaaday! Maxaad ka doonaysaa cid aan isaga (Alle) ahayn? Maxaad u magangelaysaa qayrkii? Maxaad ugu kalsoontahay meytida ku hareera socota, una illaawaysaa Allaha nool ee aan dhimanayn? Ayaa ku hafray oo kaaga warramay in ay hayso caafimaadka cid kale? Qaabkee ayay noloshu kuugu qososhay ilaa heerkan, aadna illowday kii kaa saaray uurka hooyadaa dhakhtar la'aan, kii laabteeda kuugu uumay quudka iyo kii kugu hagay horraadadeeda si aad u jaqdo? Ma illawday Allaha naxariista kuugu

umay hooyada si ay laabta kuu geliso, kuuna xannaanayso? Ma ilaa heerkan ayuu kaa gaadhay illowgu? Ma waxaad istidhi: waad ka maarmi kartaa? Kani waa Ilaahay oo xanuunka kugu xasuusinaya maalmahaagii hore, isla jeerkaasna ku leh: *ii soo noqo, sidii aan kaaga abuuray waxba la'aan ayaan kaaga qaadi karaa xanuunka e.*

## Raalli Ahaansho

Waa suuragal dawadu in ay kaaga dhowdahay sida aad u malaynayso. Kani waa Ayuub oo la faray in uu lugtiisa ku dhufto dhulka:

﴿هَٰذَا مُغْتَسَلٌۢ بَارِدٌ وَشَرَابٌ ﴿٤٢﴾﴾ [ص : ٤٢]

*"Tani waa il biyo ah oo qabow iyo sharaab."*

Dhab ahaantii, dawadu aad ayay ugu dhowayd, shaygii ka hortaagnaana waa doonistii Alle, iyo sababihii caafimaadkiisa oo aan soo idlaan. Ammintii Alle doonay in uu caafimaado Ayuub, ayuu Alle baray goobtii dawada, waanu ku caafimaaday idanka Alle. Uma baahnid in aad u socdaasho Washinton, Paris ama Bakin. Waayo, dawadaadu way dhowdahay. Keliya qalbigaaga ku xidh magaalada raalli ahaanshaha:

دواؤك فيك وما تشعر      وداؤك منك وما تبصر

*Dawadaada adiga ayaa isku haya, mana dareensanid. Xanuunkana adiga ayaa isku keenaya, mana arkaysid.*

Haddii aad raalli ka noqoto Rabbi, isna waa uu ku raalligelinayaa. *Xanuunku* waxa uu ka mid yahay imtixaannada ugu adag ee lagu shaybaadho raalli ahaanshaha. Haddii aad ku guulaysato imtixaankan, idanka Alle natiijo raalli laga yahay baa aad helaysaa. Dadka qaar ayaa isweydiinaya: *sidee ayaan raalli ugu*

*noqdaa xanuunka, iyada oo abuur ahaan la neceb yahay dhibkiisa? Ibnu Al-Qayim* oo ka warcelinaya weydiintani waxa uu leeyahay: *"labadan qodob isma diidayaan. Qofku, cudurka raalli ayuu ka noqonayaa, waayo waxa uu u keenayaa shay uu jecel yahay, sidoo kalena waxa uu dhibsanayaa xanuunkiisa. Arrinkani waxa uu la mid yahay dawada qadhaadh ee haddana qofku qaadanayo, sababta oo ah waxa uu og yahay in uu ku caafimaadayo. Sidaas si la mid ah ayuu qofku u midaynayaa raalli ahaanshaha iyo kahashada."*

Adiga oo buka dheh hadalkii Nebigu faray ummaddiisa:

"رضيت بالله ربا، وبالإسلام دينا، وبمحمد نبينا."

*"Alle ayaan raalli uga noqday Rabbi, Islaamka ayaan raalli uga noqday diin ahaan, Muxammedna waxaan raalli uga noqday nebinimo.[16]"*

Si niyad ah u dheh ducadan. Qalbigaaga ku carbi dhuuxidda macnaha ducadan, kuna maydh. Waayo, Rabbi oo raalli laga noqdaa, waa laan ka mid ah in raalli lagu noqdo falalkiisa, haddii aad raalli ku noqotana, waa uu ku raalligelinayaa! Qalbigaaga ka dhig mid neefsanaya oo haddana macaansanaya raalli ahaanshaha, kadibna u fiirso jidhkaaga. Waxaad arkidoontaa astaamaha caafimaadka oo ku soo gurguuranaya idanka Alle. Gacmahaaga ururi, baryadaadana ku akhri magaca Alle, kadibna ku masax jidhkaaga. Tufkan, ayuu Alle ku soo celinayaa waxyaabo halis ugu jiray in ay tagaan! Ka dhigo xanuunka barbilowga heshiis cusub oo aad ku baranayso Rabbigaa adiga oo kaashanaya magaciisa *ash-Shaafi.*

[16] Xadiiskan Bukhaari ayaa ku soo saaray saxeexiisa.

## Webiyo Dambiyo ah

Marar badan baad bukootay. Sow sidaas ma aha? Ayaa ku bogsiiyey? Miyaanu Alle ahayn? Maxaad isku tidhi xanuunka ku haya ma awoodo bogsiintiisa? Malahan iyo dareenkani waxa ay mudan yihiin in uu kugu ciqaabo. Waa suure xanuunkaagu in uu ka dhashay aamminaaddan bugta. Ugu horrayn, qalbigaaga ka dawee xanuunkan, kadibna maganso Allaha bogsiiyahaa, wuu ku bogsiine. Guud ahaan, bukaannada rasaysan dhakhtarradu, Ilaahay ayay ka sugayaan caafimaad. Ma jiro taah, haddii uu jirana wuu og yahay. Ma jiro xanuun, haddii uu jirana wuu ka warqabaa. Ma jiro dhib, haddii uu jirana wuu la socdaa xanuunka uu ku hayo qalbiga. Haddaba, amminta ay dhammaystiranto ujeedada Alle, taahaguna uu kaa tirtiro weybiyo dambiyo ah, ayuu faraa caafimaadku in uu ku noqdo jidhkaaga. Waaba adiga oo lugaynaya. Dhanka kalena waxa ay kaa maydhmay dambiyadii. Eebbe, waa uu ku bogsiinayaa, waayo waa naxariis badane, ogaal badane, dulqaad badane iyo awood badane! Waa uu ku bogsiinayaa, sababta oo ah waa Alle. Sababtiisa ayaad ku tirtiraysaa lambarradii iyo magacyadii dhakhtarrada. Sababtiisa ayaad ku illaawaysaa goobihii caafimaadka. Sababtiisa ayaanad ku baajinaysaa ballamadii dhakhtarka. Qolkaaga ka dhex dhiso dhakhtar cusub oo lagu magacaabo *sijaayad*, ballanna la qabso sujuudda. Qalbigaaga ku qor magac *ash-shaafi!*

*Allaha wax bogsiiyoow, bogsiintaada iyo naxariistaada u qor ruux kasta oo tamardaran, jidh walba oo daallan iyo qalbi walba oo rafaadsan, waayo adiga ayaa aqbala baryooyinka.*

# الْــوَكِيلُ

*"Yididiilooyinka aad ka filayso Ilaahay, waa dhab, filashooyinkaagu waa run biyo kama dhibcaan ah. Doonisahaaga waa laguu hadiyadaynayaa, arrimaha aad u boholyowdayna, way kuu imanayaan."*

## AL-WAKIIL (LA TALASAARTE)

Ma dareemaysaa tamadarro, dunida oo aad wax ka fahmi weyday iyo in aad noqotay baal-shimbireed ay sidato dabayli? Ma dareemayaa in aad noqotay shimbir bilaa baalal ah oo u baahan garabsiin? Ma jiraan arrimo ay ka mid yihiin: *ubad, hanti, caafimaad iyo nolol* oo aad u baqayso, isla markaana aad jeceshahay in aad u dhiibato cid aammin ah? Haddaba ka hortag iftiinnada magaca Alle  ee *al-Wakiil*. Hadda, bilaw in aad qaab cusub u barato magacan weyn. Dhexquus *macnyaashiisa, naftaadana uga raaxee tamardarradeeda, murugadeeda iyo kelinimadeeda; adiga oo hadhsanaya magaca al-Wakiil.*

### Rabbi Talasaaro

*Wakiil* waa Allaha la tasaarto, waa ka dhabarka la saaro, waa ka lagu kalsoonaado, waana ka lagu xidho yidiilooyinka. Shaqo kasta

oo aad u talasaarato Alle, ka naso maxaa yeelay, haddii aad arrimahaaga u talasaaratay, dhammaystirkooda iyo kalsoonidaada waxaad u dhiibatay Allaha hantiyey wax kasta, Allaha gacanta ku haya cirarka iyo dhulka iyo Allaha la magangalo, laakiin aan isagu cidna magangelin. Rabbi SWT oo ka hadlaya naftiisa sarraysa ayaa ku yidhi Quraanka kariimka ah:

﴿رَّبُّ ٱلْمَشْرِقِ وَٱلْمَغْرِبِ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ فَٱتَّخِذْهُ وَكِيلًا ۝٩﴾ [المُزَّمِّل : ٩]

*"Isagu waa Rabbiga qorrax ka soo baxa iyo qorrax ka dhaca ee isaga talasaaro."*

Eebbaha iska leh qorrax ka soo baxa iyo qorrax ka dhaca ayaa ku faraya in aad talasaarato, ee waa maxay *raaxada, sharafta, sarraynta iyo dammanad-qaadka ka qaalisani?* Keliya waxa uu kaa doonayaa in aad si niyad ah u tidhaahdo: *"Allahayoow, adiga ayaan ku talasaartay."* Ma jirtaa cid korjoogta dhulkan oo ka hodsan Ilaahay, isla markaana ku faraysa in aad talasaarato keligii? Dhab ahaantii, lama helayo ciddan, waayo insaanku ma laha awood uu wax kasta kaaga ilaaliyo. Ma laha taag uu wax walba kaaga difaaco, mana laha tamar uu shay walba kuugu caawiyo? Ilaahay oo keliya ayaa hadlan ku leh, isagaa sidan samayn kara, awoodna u leh hirgelinteeda! Talasaraashadu waa kalsooni dhab ah oo ku siinaysa dallaayad weyn oo kaa ilaalinaysa kulka murugada, roobka shirqoollada iyo dabaylaha adduunyada walbahaarka ah. Qofka bilaa ayaanka ahi waa ka aan raadsan dalladan, isla markaana aan hoos ka dhigan. Boqorka boqorrada ayaa ku faraya in aad talasaarato. Waxa uu ku farayaa in aad u bandhigto baahiyahaaga, si uu kuugu gudo. Waxa uu ku farayaa in aad ku tiiriso dhabarkaaga si uu kaaga difaaco leebabka ballan-furka. Waxa uu ku farayaa in

aad u dhiibato arrinkaaga oo dhan si uu kuugu dhammeeyo habka ugu dhammayska tiran. Haddaba, weydiintu waxay tahay: *maxaad sugaysaa? Waa maxay sababta aad u guddooman la'dahay galladani? Ayaa ku siin kara intan wax ka badan?*

Si cabsi leh ayaynu ugu xidhannahay ciidda. Akhri hadalkan Rabbi:

﴿وَتَوَكَّلْ عَلَى ٱلْعَزِيزِ ٱلرَّحِيمِ ﴿٢١٧﴾ ٱلَّذِى يَرَىٰكَ حِينَ تَقُومُ ﴿٢١٨﴾ وَتَقَلُّبَكَ فِى ٱلسَّٰجِدِينَ ﴿٢١٩﴾﴾ [الشُّعَرَاء : ٢١٧ - ٢١٩]

*"Talasaaro Allaha sharafta iyo naxariista leh. Kaas oo ku arkaya amminta aad kacayso iyo marka aad la gadgaddoomayso kuwa tukanaya."*

Waa maxay arrinka weyn, dhibka daran iyo hammiga culus ee ku adag Rabbiga sharafta leh? Sharaf oo dhan Ilaahay ayaa bixiya. Sharaf kasta oo aan arkay, maqlay ama aan bartay Alle ayaa bixiyay. Haddaba, ma filaysaa dhibaatooyinka ku haystaa in ay ku adag yihiin Rabbiga iska leh sharafta, kibirka iyo weynida?

## Qorshe-Sannadeed

Shayga ugu weyn ee aynu ku talasaaranayno Rabbi, waa cibaadadiisa. Waxa waajib kugu ah in aad faraha ka qaaddo xeeladdaada iyo xooggaaga, si niyad ahna aad uga tidhaahdo carrabka qalbiga ka hor:

﴿إِيَّاكَ نَعْبُدُ وَإِيَّاكَ نَسْتَعِينُ ﴿٥﴾﴾ [الفَاتِحَةِ : ٥]

*"Adiga oo keliya ayaannu ku caabudaynaa, adiga oo qudhana waannu ku gargaar weydiisanaynaa."*

Ilaahay, cibaadadiisa ayaad ku weydiisanaysaa gargaar, iyada ayaad ku talasaarnaysaa, awoodna kaga codsanaysaa. Suuragal ma aha in Ilaahay ku faro in aad caabuddo keligii, kadibna ku hoojiyo. Arrinkani waa waxaan dhacayn. Sidee ayaad u caabudaysaa Alle adiga oo jecel, kadibna aanu kuu caawinayn? Keliya badi weedhahan wanaagsan ee ka sugan Nebiga NNKH:

"اللهم أعني على ذكرك وشكرك وحسن عبادتك."

*"Allahayoow, igu garabsii xuskaaga, mahadnaqaaga iyo wanaajinta cibaadadaa.[17]"* Ma waxa aan ku idhi: *badso ku celcelinta ducadan?* Waan ka cudurdaaranayaa hadalkan. Keliya ha badsan ee ku darso jadwalkaaga maalinlaha ah, qorshe-sannadeedkaaga iyo yoolasha noloshaada. Haddii aanu kuu gargaarin Rabbi, ma jirto cid kuu gargaaraysaa! Haddii aanu ku caawin Alle, ma jirto awood ku caawinaysaa. Haddii aanu ku garabsiin Alle, waxba ma qabsan karaysid. Haddii aanu Ilaahay, ku fududayn arrimaha, adduun iyo aakhiraba waad khasaaraysaa.

*Ibnu al-Qayim* waxa uu yidhi: *"Sheekh Islaam ibnu Teymiya ruuxdiisa Alle ha dahiro e, ayaa yidhi: waxaan u kuurgalay ducada ugu waxtarka badan, waana Rabbi oo la weydiisto in uu kugu garabsiiyo raalli ahaanshihiisa. Ducaddanna waxa aan ka helay suuradda al-Faatixa:*

﴿إِيَّاكَ نَعۡبُدُ وَإِيَّاكَ نَسۡتَعِينُ ۝٥﴾ [الفَاتِحَةِ : ٥]

Mar kale, sheekhu waxa uu yidhi: *"qalbiga insaanka waxa ku dhaca laba xanuun oo waaweyn, haddii aanu iska dawaynna waxay u horseedaan halaag. Waana istusnimada iyo isla-weynida. Dawada istusnimadu waa:*

[17] Xadiiskan Abu Daa'uud iyo Nasaa'i ayaa ku soo saaray sunankooda.

*"adiga uun baannu ku caabudaynaa", dawada isla-weyniduna waa: "adiga uun baannu gargaar ku weydiisanaynaa."*

*Ibnu Al-Qayim* ayaa mar kale yidhi: "in badan oo badan baan ka maqlay *Ibnu Teymiya* (AHN): "إياك نعبد", *istusnimad ayay ka xaysaa,* "وإياك نستعين", *kibirka ayay tagsiisaa."*

Miyaanad arkayn salaaddan aad u gacan baxayso gudashadeeda! Ilaah baan ku dhaartaye, haddii aanu kugu garabsiin Alle, ma aad tukateen.

## Alle Isu Dullee

Alle, waa naxariis badane ee u bandhig baahiyahaaga, qalbigaagana ugu dullee sida in uu ku sugan yahay carshiga hoostiisa oo kale. Haddii aanad khushuucaynna, Allaha naxariista badan baa kaa doonaya. Intaa kadibna, ku kalsoonow in uu kuu gudidoono baahiyahaaga iyo in uu kaa bogsiindoono xanuunka, isla markaana uu kuugu beddelidoono farxad. *Yididiilooyinka aad ka filayso Ilaahay, waa dhab, filashooyinkaagu waa run biyo kama dhibcaan ah, doonisahaaga waa laguu hadiyadaynayaa, arrimaha aad u boholyowdayna, way kuu imanayaan.*

Alle SWT, waxa uu ku leeyahay:

﴿وَتَوَكَّلْ عَلَى ٱلْعَزِيزِ ٱلرَّحِيمِ ۝٢١٧ ٱلَّذِى يَرَىٰكَ حِينَ تَقُومُ ۝٢١٨﴾

*"Talasaaro Allaha sharafta iyo naxariista leh. Kaas oo ku arkaya amminta aad kacayso."*

Allaha aad dartii u tukato, ka aad dartii wajigaaga ugu xoqdo dhulka iyo ka aad dartii u foorariso madaxaaga ayaa xaq u leh in aad ku xidho baahiyahaaga, in aad weydiisato caafimaad, in uu

noqdo halka aad ka magangasho cabsiyaha kula soo darsa iyo ka kuu rumaynaya riyooyinkaaga.

فالزم يديك بحبل الله معتصما فإنه الركن إن خانتك أركان

*Ku dheg xadhiga Ilaahay adiga oo xajisanaya, maxaa yeelay waa tiir adag, haddii ay ku dhakraan tiirarka kale.*

Gabadh wanaagsan baa go'aansatay in ay waxbarasho dibadda ah u dirto wiilkeeda. Hooyadani waxay ka warqabtay in ay da'yar badani ku baabe'een qurabaha, dhanka kalena duruufaha ayaa ku khasbayay in ay dirto wiilkeeda. Waxa ay garwaaqsatay in Alle wax kasta karo, salaad walba oo ay tukatana inankeed ayay ugu ducayn jirtay in uu ilaaliyo. Wiilkii waxbarashadii ayuu ka soo noqday isaga oo ka mid ah dadka aan ka bixin masjidka. Habeenkii ayuu kici jiray, wanaagga ayuu dadka farijiray, xumaantana waa uu ka reebi jiray! Socdaalkanna waxa uu ka dheefay qiyam iyo akhlaaq aanu hore u lahaan jirin! Suurtagal ma tahay in Ilaahay lumiyo wiil ay hooyadii hadh iyo habeenba u ducayso, isla markaana ay ku Alle barido: *"Eebboow, adiga ayaan ku talasaartay ee ha igu hoojin wiilkayga!"*

**Illinta Dhoollacaddaynta!**

Haddii uu boqor kugu yidhaahdo: i wakiilo aniga ayaa xaqaaga kaaga soo dhicinaya ninkii kaa dhacay. Keliya i wakiilo. Shaki ma kaa gelayaa in aan xaqaaga laguu soo dhicinayn? Keliya waxa aad u baahan tahay in aad saxiix u dhiibto kaaliyayaasha boqorka, si ay kuugu soo qabtaan qofkii ku dhacay oo gariiraya. Ka warran haddii uu boqorku saxiixo, isla markaana uu amar ku bixiyo in la fuliyo dalabkaaga? Iska illow boqorkan iyo kaaliyayaashiisa, kadibna fiirso aayaddan Quraanka ah:

﴿ وَتَوَكَّلۡ عَلَى ٱلۡحَيِّ ٱلَّذِي لَا يَمُوتُ ﴾ [الفُرْقَان : ٥٨]

*"Talasaaro Allaha nool ee aan dhimanayn."*

Dhab ahaantii, waxaad illowday guud ahaan baahiyihii aad dareemaysay? Sidaas miyaanay ahayn? Cabsidii, go'aan xumadii iyo filasho-waagii way kaa tegeen. Alle, dhibka ku haysta xal ayuu u beddelaa, rajooyinkaaga run buu ka dhigaa, ilmadaadana dhoollacaddayn ayuu u rogaa. Xataa dhimashaadada kadib, Allaha nool ee aan dhimanayn ayaa xaqaaga u soo dhicinaya ubadkaaga. Ha isku hawlin ilbidhiqsiga ay ubadkaagu dhibsan doonaan xanuunkaaga, maxaa yeelay waad dhimanaysaa. Balse boqorka ma dhintaha ah baa u hadhaya. Wuu la jirayaa, xaaladdooda ayuu u tudhayaa, noloshoodana waxa uu ka dhigayaa mid ka wanaagsan noloshaadii. Sababta oo ah waa noole aan dhimanayn.

## Ogsajinta Nolosha

Xataa haddii aan qofna ku dulmiyin, talasaaro Ilaahay! Talasaarashadu ma aha faq aad kaga cabato dulmifalaha iyo codsi aad ku doonto in lagaa caawiyo shaqo gaar ah oo qudha! Talasaarashadu waa Ogsajinta nolosha. Ogsajin la'aan ma noolaan kartaa? Alle, talasaaro xaaladda badqabka. U talasaaro Rabbi: *garaaca wadnahaaga, dhaqdhaqaaqa xubnahaaga qulqulka dhiiggaaga iyo cuntada u kala gudbaysa waaxyaha jidhaaga*. Haddii aan Alle fari lahayn xirribahaaga in ay isqabtaan, indhahaaga ayaa qallali lahaa. Carrabkaaga, haddii aan Rabbi u ogolaan dhadhamada, maad noolaateen. Dubkaaga sare, haddii aan Alle ogolaan in uu wax dareemo, dareen la'aan ayuu la googi'i lahaa.

Barbaarinta ubadkaaga u talasaaro Alle. Fara badanaa inta aynu aragno ubad ku barbaaray masjidka, kadibna diinta ka baxay. Badanaa inta aynu aragnay ubad lagu harqiyey hanti badan, balse gadaal nolosha ka dhacay. Badanaa inta aynu aragnay ubad ay ka warhayn jireen walaalohooda ka waaweyni, balse gadaal ka firdhaday. Ilaahay oo keliya ayaa og hanuunka ku jira qalbiga ilmahaaga. Ilmahaaga, ugu ducee in Rabbi qalbigiisa ka buuxiyo iimaan, talanasaaro adiga oo leh*: "Allahayoow, kani waa ilmahaygii, adiga ayaana wada leh ee hanuuni oo jidkaaga tus, anigana igu garabsii barbaarintiisa. Allahayoow, salaad ku kari maayo haddii aanad igu caawin, isaguna tukan maayo haddii aanad ku kaalmayn. Allahayoow, nagu garabsii xuskaaga, mahadnaqaaga iyo wanaajinta cibaadadaada."*

## La'aantii noloshu waa Jaxiima!

Liibaanta noloshaada u talasaaro Ilaahay, waayo la'aantii noloshu waa jaxiima. Waxay yidhaahdaan, si aad u hanato qalbiga xaaskaaga, isla markaana ay kuu jeclaato: *ammaan, si waafiya ugu warran, u dhoollacaddee, si dabacsanna ula dhaqan.* tallaabooyinkan oo dhami waa sax. Balse intaa ka hor iyo kadibba dheh: *"Allahayoow, ii wanaaji xaaskayga."* Alle, u kaasho ooridaada, una talasaaro adiga oo leh: *si kasta oo aan ugu dhoollacaddeeyo xaaskayga, dheef ma laha haddii aanad doonin Allahayoow.* Ilaahay, isku dhuldhig adiga oo leh: *"qalbigeedu gacantaada ayuu ku jiraa ee Allahayoow iskugu kaaya hagaaji."* Ilaahay, waxa uu kaa doonayaa qirashada tamardarradaada, hayn-yaraantaada iyo in uu keligii yahay awood badanaha sharafta iyo weynida leh. Marka aad sidaas samayso, afar daloolow seddex dalool ayaad la timid talasaarashada. Haddii aad

sidan fasho, guud ahaan waxyaabaha kugu xeeran isbeddel baa ku imanaya. I rumayso, way isbeddelayaane. *Iska illow baahiyahaaga, riyooyinkaaga iyo murugooyinkaagaba.* Aynu suuraysanno adiga oo ah qof bilaa baahi, bilaa riyooyin, bilaa murugo iyo bilaa cudur ah. Waxaad u baahan tahay in aad talasaarato Ilaahay, si uu kuu jeclaado. Sow uma baahnid jacaylkiisa?

﴿إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُتَوَكِّلِينَ ١٥٩﴾ [آل عِمْرَان : ١٥٩]

*"Eebbe waxa uu jecel yahay kuwa talasaarta."*

In Alle, jeclaado addoonku waxa ay ka dhigan tahay qof kasta oo soo maraana in uu jeclaado, una boholyoobo. Allaha xaqa ah ee keligii mudan cibaadada ayaa ku jeclaanaya. Intaa oo qudha ayaa ku filan in aad u guclayso ku xidhnaashihiisa, talasaarashadiisa iyo in aad caashaqdo magacan astaanta u ah weynaanta.

## Alle ayaa igu filan!

Dadka badhkii ayaa ka shaqaynaya in ay ku reebaan, in ay kula dhaadhacaan, in ay ruxaan kalsoonida qalbigaaga iyo in ay ku dheelaan dareennadaada. Waxa ay ku faraan cabsi, isdhiibid iyo beddelidda go'aammadaada iyo mabaadi'daada nololeed. Xaaladdan oo kale, iimaanka ku dhaq qalbigaaga adiga oo leh:

حسبي الله ونعم الوكيل.

*"Ilaahay ayaa igu filan, cid la talasaartana isaga ayaa ugu wanaagsan."*

Daqiiqaddan, waxaad dhaxlidoontaa nimco ka timid xagga Ilaahay iyo dheeraad, xumaanina ku taabanmayso. Si dareen leh u akhri aayadahan:

﴿ٱلَّذِينَ قَالَ لَهُمُ ٱلنَّاسُ إِنَّ ٱلنَّاسَ قَدْ جَمَعُواْ لَكُمْ فَٱخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَٰنًا وَقَالُواْ حَسْبُنَا ٱللَّهُ وَنِعْمَ ٱلْوَكِيلُ ﴿١٧٣﴾﴾ [آل عِمْرَان : ١٧٣]

﴿فَٱنقَلَبُواْ بِنِعْمَةٍ مِّنَ ٱللَّهِ وَفَضْلٍ لَّمْ يَمْسَسْهُمْ سُوٓءٌ﴾ [آل عِمْرَان : ١٧٤]

*"Muuminiintu waa kuwii ay dadku ku yidhaahdeen: dadkii ayaa isku kiin soo gaashaanbuuraysatay ee baqa. Hadalkani iimaan ayuu u kordhiyey, waxaanay yidhaahdeen: Alle ayaa nagu filan, mid la talasaartana isaga ayaa ugu wanaagsan. Waxa ay la soo gaddoomeen nimco ka ahaatay xagga Alle, iyo dheeraad, xumaanina ma ay taaban."*

Xumaani kugu dhici mayso. Xataa taabashadeedii aad is lahayd kama badbaadaysid, ayaad ka badbaadaysaa. Jidhkaaga taaban maayo dhaawac, qalbigaaguna dareemi maayo murugo idanka Alle. Si niyad ah u akhri aayaddan Quraanka kariimka ah:

﴿تَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلًا ﴿٣﴾﴾ [الأَحْزَاب : ٣]

*"Talasaaro Ilaahay, isaga ayaa ku filan qofka talasaarta e."*

Marka aad Alle talasaarato, ha aamminin in aanay jirin cid kale oo la talasaartaa. Maya, waxaad talasaarataa shayga ugu weyn ee uu talasaaran karo makhluuq. Dadka qaar ayaa yidhaahda: *"duco ayaa ila da' ah!"* Cajiib! Oo ma waxa jirta awood ka weyn ta keliya ee aad haysato?! Baryadu waa jaad ka mid ah talasaarashada. Ducadu waa kalsooni qalbiga ka timid inta aanay noqon weedho lagu dhawaaqo. Ilaahay, wax kasta waa uu awoodaa, baryaduna waa humaagyada ugu saxsan talasaarashada! Ka odhanaya: *"hebel ma laha cid aan Alle ahayn."*, ku dheh: *"cid la talasaarto Ilaahay baa ugu weyn."* Haa, Ilaahay baa ugu weyn. Maxaa ka dhiman addoonka

haddii uu la jiro boqorka boqorrada ee iska leh qorrax ka soo baxa iyo qorrax ka dhacu?!

خذوا دنياكم واتركوا فؤادي حرا طليقا غريبا
فإني أعظمكم ثروة وإن خلتموني وحيدا سليبا

*"Qaata addoonyadiinna oo dhan, iigana taga qalbigayga oo xor ah. Maxaa yeelay, aniga ayaa idinka hanti badan, xataa haddii aad iga tagtaan keligay oo dhacan."*

## Sabab lagu qanci karo

Ma garanaysaa sababta ay kuugu filan tahay talasaarashada Alle? Waxa jirta sabab lagu qanci karo ilaa xad, waana in uu yahay boqorka leh cirarka iyo dhulka.

﴿وَلِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلًا ﴿١٣٢﴾﴾ [النِّسَاء : ١٣٢]

*"Alle, ayaa iska leh waxa ku dhex sugan cirarka iyo dhulka, cidda talasaaratana waa uu ku filan yahay."*

Kuwa aad ka baqayso miyaanay ahayn dad deggan dhulkan? Haddaba, isaga ayaa maamula. Xanuunka ku daashaday ee aad weyday dawadiisu miyaanu ka iman dhulkan? Alle, ayaa keenay, isaga ayaana kaa qaadi kara. *Dhibaatooyinkan, murugooyinkan iyo mashquulladani miyaanay ka iman dhulka?* Haddaba, talasaaro Allaha iska leh dhulka, si uu eray keliya kaaga qaado guud ahaan dhibaatooyinka ku haysta. Alle, isaga ayaa wax kasta abuuray, sidaas awgeedna isaga ayaa maamula. Aynu talasaaranno:

﴿ٱللَّهُ خَٰلِقُ كُلِّ شَيۡءٖۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ وَكِيلٞ ﴿٦٢﴾﴾ [الزُّمَر : ٦٢]

*"Ilaahay ayaa wax walba abuuray, shay kastana isaga ayaa wakiil ka ah."*

Ma lihin cid aan ahayn Alle. Haa, isaga ayaa ugu wanaagsan cid la talasaarto. Mana jiro wakiil ka weyn oo lagaga kalsooni badan yahay.

## Digtoonow!

Ka digtoonow talasaarashada cid aan Alle ahayn. Ka dheerow magangalka Rabbi qayrkii. Haddii aad sidan samayso, waxa kugu habsan wahsi, waxa kugu soo duuli waswaas, qalbigaaguna waxa uu raacayaa laamaha adduunyada! Eebbe weyne waxa uu yidhi:

﴿أَلَّا تَتَّخِذُواْ مِن دُونِي وَكِيلًا ۝٢﴾ [الإسْرَاء : ٢]

*"Sokoday ha samaysanina cid aad talasaaratataan."*

Xaaran ayay kaa tahay in aad Alle sokodii raadiso qayrkii. Xaaraan ayay kaa tahay in aad cid kale talasaarato Alle sokodii. Xaaraan ayay kaa tahay in aad cid kale magansato Alle oo la socda xaalkaaga. Maxaa yeelay, waa maqal iyo ogaal badane ee isaga talasaaro. Waxa uu maqlidoonaa shay kasta oo qarsoon. Waxa uu og yahay arrin walba oo mugdi kaa gala. Sidee ayaad u talasaaranaysaa qayrkii oo aan maqlin, sidoo kalena aan ka warqabin arrimihii aynu soo xusnay?! Eebbe waxa uu yidhi:

﴿وَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ۝٦١﴾ [الأَنفَال : ٦١]

*"Talasaaro Alle, waayo waa maqal iyo ogaal badane."*

Dulmifalaha kugu digtaa waxa uu ka mid yahay makhluuqiisa ee Alle talasaro waa uu kaaga filnaane. Sidoo kale, hannaan sharaf leh u dheh:

﴿إِنِّي تَوَكَّلْتُ عَلَى ٱللَّهِ رَبِّي وَرَبِّكُمۚ مَّا مِن دَآبَّةٍ إِلَّا هُوَ ءَاخِذُۢ بِنَاصِيَتِهَآ﴾

[هُود: ٥٦]

*"Waxaan talasaaranayaa Rabbigay iyo Rabbigiin, mana jiro shay dul tukaba dhulkan, haddii uu jirana fooddiisa ayuu qabanayaa."*

Shaydaanka uu Alle siiyay ciidanka iyo awoodaha ay ka midka yihiin: *waswaasinta, baqagelinta iyo isu-ekaysiinta iqb*, ayaan awoodi karin in uu gaadho qofka Ilaahay talasaartay, ee maxaad u malaynaysaa maamulaha shaqadaada, deriskaaga xun iyo madaxweyne ama wasiir? Rabbi baa yidhi:

﴿إِنَّهُۥ لَيۡسَ لَهُۥ سُلۡطَٰنٌ عَلَى ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَلَىٰ رَبِّهِمۡ يَتَوَكَّلُونَ ٩٩﴾

[النَّحل : ٩٩]

*"Shaydaanku awood kuma laha kuwa iimaanka laga helay, isla markaana talasaranaya Rabbigood."*

Maanka ku hay aayaddan:

﴿وَمَن يَتَوَكَّلۡ عَلَى ٱللَّهِ فَهُوَ حَسۡبُهُۥٓ﴾ [الطَّلَاق : ٣]

*"Qofk talasaarta Ilaahay, isaga ayaa ku filan."*

Uma qofna baahnid haddii aad ku kalsoon tahay Alle iyo haddii aad talasaarato, isla markaana aad ka dhigato gargaarahaaga. Isaga ayaa kugu filan oo xumaantana kaa celinaya. Haddii aanay ku hareer joogin ilaalinta Alle, dhab ahaantii waad halaagsantay! Noloshu waa beer ay muush ka yihiin xanuun, rafaad, khuraafaad, qorshayaal iyo shirqoollo, haddii aanu Rabbi ku ilaalinna way ku qaniini masaskan halistii! Kuma cabsigelinayo, balse waa xaqiiqo biyo kama dhibcaan ah ee dheh: *"Allahayoow, adiga ayaan ku talasaartay."* Si dhab ah ma u tidhi? Hadda, dhoollacadee, waayo waxa aad ka badbaaday masaskan!

## Waxyaabo halis ah

Isla marka aad ka baxdo guriga, bannaanka waxa kugu sugaya: *shil halis ah, hawo xanuun xambaarsan, god aad ku dhici karto, qof xun oo ku caayi raba, mid kale oo ku xaasidaya, shaqaale liita oo ku daalinaya, ama tukaanle ku dhakraya.* Haddaba, si aad uga badbaado aafooyinkan, xilliga aad baxayso ku ducayso dardaarankii Nebigaaga deeqsiga ah (NNKH):

"بسم الله توكلت على الله، اللهم إني أعوذ بك أن أضل أو أضل، أو أزل أو أزل، أو أظلم أو أظلم، أو أجهل أو يجهل علي."

*"Bismillah. Magaca Alle, ayaan talasaartay. Eebboow, waxaan kaa magangelayaa in aan lumo ama la i lumiyo, in aan simbiririxoodo ama in la i simbiririxiyo, in aan cid ku gardarroodo, ama la igu gardarroodo iyo in aan noqdo waxma-garato, ama la iga dhigo waxma-garato[18]."*

Bax hadda adiga nuugaya hawada waafajinta iyo fududaynta Alle idankii. Cabsiyahan oo dhami ma jiraan. Haddii aad seexato, dhabarkaaga ku tiiri Rabbi, arrimahaagana u dhiibo adiga oo jecel, kana baqayn. Daqiiqad kasta maanka ku hay in uu jiro Rabbi ku faraya talasaarashadiisa, waayo adiga ayaa u baahan. Waligaa ha lumin fursaddan, hadiyaddan iyo hibadan lama helaanka ah.

*Eebboow, naga yeel kuwa ku talasaarta iyo kuwa ku magangala. Qalbigayagana ka buuxi iimaan aanu iskaga maydhno dan-u-yeeladka qayrkaa.*

[18] Xadiiskan waxa soo saaray Abu Daa'uud.